MAJALADDA MARAG

Cadadka Afaraad | July 2025

# FEDERAAL AMA KALA FOGAANSHO? WAA GO'AANKA QARANKA

Nuuradiin Aadan Diiriye

Bogga: 4




Xigashada Sawirka: Cabdishakuur Haybe

# Qorayaasha Majaladda




**Nuuradiin Aadan Diiriye**
Federaal ama Kala Fogaansho? Waa Go'aanka Qaranka — 4



**Danjire Maxamed Cali Nuur**
Is caawinta Soomaaliyeed: Asal, Awood iyo Aayatiin Wanaagsan — 7



**Cabdiraxmaan Shiikhdoon**
KAALINTA DHALINYARADA EE ISBEDELKA IYO HORUMARKA BULSHADA — 10



**Cabdirashiid Xaashi**
Kanada iyo Gooni-goosadka Quebec: Maxay Soomaalidu Ka Baran Karaan? — 14



**Dr. Maxamed Cali Faarax**
Maxay yihiin caqabadaha laga gudbi La' yahay ee Doorashooyinka Soomaaliya? — 18



**Faarax Cusmaan**
Puntland Maanta: Jahwareer Siyaasadeed mise Fursad Cusub? — 23



**Dr. Liibaan Cigaal**
Soomaaliya iyo Himilada Caafimaadka Loo Siman Yahay: Waa Riyo Hore oo Rajadeedii soo Muuqatay — 26



**Saki Rabiica**
XAQQA ARAGTI DHIIBASHADA — 30



**Cabdullahi Bootaan**
Mustaqbalka Tiknooloojiyadda & Waxbarashada — 33

# Dhambaalka Tifaftiraha

Waxaa farxad iyo bogaadin noo ah in aan soo saarno daabacaadda Afaraad ee Majalladda Marag, oo ah madal aan ugu talagalnay in lagu daabaco macluumaad kala duwan sida warbixino, falanqayno, iyo aragtiyo ay diyaariyeen dad kala duwan oo ka tirsan bulshada, sida cilmi-baarayaal, suxufiyiin, aqoonyahano, hal-abuurro, iyo dadka kale oo khibrad iyo aqoon u leh dhinacyada kala duwan ee nolosha.

Majalladda Marag, oo la qorsheeyay in la daabaco hal mar bishii, waxaa aasaasay xarumaha ku midaysan Iskaashiga Xarumaha Warbaahinta Soomaaliyeed (Somali Newsrooms Coalition – SNC). Iskaashigan wuxuu ka kooban yahay xarumo kala duwan, kuwaas oo kala ah: Milgo Media, Puntland Mirror, The Daily Somalia, Horufadhi Media, Dookh Press, iyo Gaashaan Dialogue.

Ujeeddada majalladdan waa in la helo madal ka duwan warbaahinta caadiga ah ee dalka ka jirta, kuwaas oo inta badan xoogga saara soo tebinta dhacdooyinka maalinlaha ah. Majalladdan waxay hiigsaneysaa inay bulshada u gudbiso macluumaad waxtar leh oo kor u qaada wacyiga iyo fahamka bulshada, kobciya doodaha iyo aragtiyaha caafimaadka qaba, soo bandhiga dhaliilo wax dhisaya oo daahfuran, islamarkaana dhiirrigeliya gaar ahaan dhalinyarada, si ay u noqdaan kuwo xog ogaal ah, si buuxda u fahma xaaladda dhabta ah, una gaari karaan go'aammo sax ah oo noloshooda iyo bulshada wax ku ool u ah.

Majaladdan waxay ka madax-bannaan tahay aragtiyaha siyaasadeed ee kala duwan ee dalka ka jira, waxayna u furan tahay qof walba oo doonaya in uu la wadaago bulshada fikrado, warbixino, iyo falanqeyn ku saleysan aqoon iyo waayo-aragnimo.

**Cabdi Cumar Bile**
Tifatiraha Guud



Xigashada Sawirka: Cabdishakuur Haybe

# FEDERAAL AMA KALA FOGAANSHO

## Waa Go'aanka Qaranka

Nuuradiin Aadan Diiriye

Qaran su'aal la geliyay jiritaankiisa wuxuu taagan yahay meel halis ah oo ay hal kala-doorasho u kala jebin karto ama u mideyn karto: federalnimo sax ah ama kala fogaansho cusub oo ku danbeynaysa kala tag qaranimo?. Maqaalkani wuxuu si toos ah ula hadlayaa maskaxda iyo damiirka akhristaha Soomaaliyeed—si aan u muujiyo in su'aashani aysan ahayn mid dastuureed ama sharciyeed oo keliya, balse ay tahay mid ku saabsan jiritaanka Soomaaliyeed ee qarniyada soo socda.

Qaran aan nidaam cad u lahayn uguna dhaqmeyn awood qaybsiga, mideynta ciidamada qalabka sida, iyo adeeg dowladeed oo loo simanyahay ma aha dowlad dhab ah ee waa magac u yaal. Tan iyo ansixintii Axdigii Ku-meelgaarka ahaa ee Soomaliya sanadkii 2004, waxaan ku dhaqaaqnay hannaan federali ah oo lagu beddalay nidaamkii dowladdii dhexe ee awoodda halka meel taalay loogana badbaadinayay Soomaaliya, oo markaa aad u kala qoqobneyd in ay sii kala tagto. 21-sanadood ka dib, waxaa maanta la oran karaa in aan tallaabooyinkii wax ku oolka u ahaa federaaleynta iyo mideynta dalka aan lagu tallaabsan.

Sideedaba dhibaato lama xallin karo iyadoo weli lagu fakarayo isla maskaxdii abuurtay dhibaatadaas. Xilligii la qaadanayay nidaamka federaalka, aragtiyada aadka u kala fogaa ayaa ahaa mid u kala firirsan labo gees: mid doonaysay in wax walba lagu uruuriyo caasimadda, iyo mid kale oo qabtay in Soomaali kala tagto oo gobol walba isku tashado. Labaduba waxay ahaayeen falcelin ka timid xaaladihii xilligaa abuurnaa, balse midna xal ma noqon.

Xalku wuxuu noqday federaalnimo dalka hogaamisa iskuna haysa, balse ilaa iyo maanta lama gaarin waxyaalaha udub-dhexaadka u ahaa nidaamka federaalka oo aheyd:

- Dowlad dhexe oo matalaysa qaranka oo aan maroorsan gobollada.
- Dowlad-goboleedyo leh masuuliyad iyo matalaad aan kala goyn qaranimada.
- Ciidan mideysan oo ka madax bannaan beeleysi.
- Nidaam dhaqaale oo si caddaalad ah u qaybiya dakhliga.
- Hay'ado qaran oo shacabka u muuqda oo aan ku ekeyn cod ka baxa idaacadda oo keliya.

Ilaa iyo maanta arimahaasi oo dhan waa kuwo ku qoran waraaqo, looga hadllo shirar, lagu baahiyo warbaahinta balse ma aha kuwa ka jira waaqica dalka iyo nolo-maalmeedka ummadda. Waxaa naga maqani waa hirgelin dhab ah.

## JAMHUURIYADDII LABAAD: HALGAN DIB-U-MIDEYN QARAN

Waa inaan si geesinimo leh u aqbalno in Jamhuuriyaddii Koowaad ee Federaalka aysan shaqeyn; tii labaad ee Federaalka Soomaaliyeedna aan wali la dhisin. Waxa aan u baahan nahay maanta ma aha dib-u-habeyn, ee waa dib-u-aasaas qaran — mid dalka iyo dadka mideysa, dalkana ka xoreeya xoogagga nabad-diidka ah.

Soomaaliya uma baahna ballan-qaadyo cusub; waxay u baahantahay Jamhuuriyad cusub — mid leh shuruudo cad, himilo qaran, iyo awood muuqata oo laga dareemo Boosaaso ilaa Baydhabo. Waxaa lama huraan ah in la helo: ciidan qaran oo mideysan oo leh hal talis kana madax bannaan beeleysi, nidaam dhaqaale federaal ah oo kheyraadka si cadaalad ah loogu qaybiyo, iyo dowlad shaqeysa oo si siman u gaarta muwaadin kasta — sida roobku u gaaro daaqsinada kala duwan.

Maanta, su'aashu ma aha: Ma dhiseynaa? ee waa: Ma sii wada joogi doontaa Soomaaliya haddii aan la dhisin?

Jamhuuriyaddu ma aha xusuus, ee waa ballan. Waxaa la joogaa waqtigii ballantaas la cusbooneysiin lahaa — oo dib loogu dhisi lahaa Jamhuuriyaddii Labaad ee Federaalka Soomaaliyeed, mid la kasbay, la xoojiyay, laguna dhisayo kalsooni la wadaago.

Qaranimo laguma ilaasho calan la lullo oo keliya; waxaa lagu ilaaliyaa dareenka qof kasta oo rumaysan in uu ka mid yahay cidda calankaas difaacaya. Marka gabadh xiran dhar jaamacadeed ay shahaado ka qaadato Baydhabo, balse shaqada ugu horreysa la waydiiyo 'yaa ku keensaday?' — halkaa waxaa ku burbura dareenkii ay ka lahayd qarannimada. Marka wiil ku dhashay Tawfiiq uu ka baqo inuu Garowe tago si uu u codsado shaqo dowladeed, isagoon cid ka garaneyn awgeed — qarannimadaas waa mid la daalinayo ee ma aha mid la wada difaaci doono. Marka sarkaal ciidan uu muddo tababar uu ku jiray ku soo guuleysto, balse uu ku xayirmo meeshaas isagoon haysan xildhibaan shafka u garaaca, qaranimadaasi waa mid iska lulmeysa.

Waxaan ognahay — caqli ahaan iyo taariikh ahaanba — in nidaam ku dhisan sinnaan la'aan iyo isir kala saar aan laga filan karin dowladnimo. Haddaan taas ognahay, sideen uga aamusi karnaa? Haddii hoggaankii hore uu ku guuldareystay 21-kii sanadood ee la soo dhaafay inuu ka shaqeysiiyo mideyn iyo xoreyn dhab ah, maxaan weli ugu lebbisanaynaa khaladkii hore — iyadoo aan weli ka rajo qabno natiijo cusub?

## DARDAARAN QARAN

Haddii aan dooneyno in Soomaaliya ay sii jirto oo sii wada joogto boqolaalka sanadood ee soo socda, go'aanku waa in aynu qaadannaa maanta, mana aha mid beri sugi kara. Federaal la taaban karo ma aha muran siyaasadeed; waa baaq ay ka dhursugayaan jiil dhan oo rajo u taagan.

Soomaaliya uma baahna qabiil xoog leh, dowlad-goboleed keligeed kor u socota, caasimad keligeed kobcaysa, ama madaxweyne hadal badan — waxay u baahan tahay nidaam shaqeeya, qaran mideysan iyo jihayn la wada leeyahay.


Waqtiga wax lagu sixi karo waa hadda. Jiilalka cusub waa ay na dhegeysanayaan, balse su'aashu waa: miyaan u jawaabeynaa? Haddii aad rumeysan tahay in Soomaaliya ay mudan tahay dowlad cadaalad ah, ha sugin hoggaan mucjiso ah. Noqo qayb ka mid ah qaran-dhiskeeda.

**W/Q:** Nuuradiin Aadan Diiriye
*Siyaasi, Diblomaasi iyo Hal-abuure Nabadeed*



**Xigashada Sawirka:** Cabdishakuur Haybe

Xigashada Sawirka: Puntland Post




# IS CAAWINTA SOOMAALIYEED:

## Asal, Awood iyo Aayatiin Wanaagsan

Danjire Maxamed Cali Nuur (Ameeriko)

Is-caawinta waa mid ka mid ah tiirarka ugu muhiimsan ee lagu dhiso bulsho adkaysi leh, midaysan, oo horumar gaarta. Ummadda Soomaaliyeed, oo leh dhaqan fac weyn, diin suuban iyo hiddo la isku hallayn karo, waxay muddo qarniyo ah ku dhaqmayeen hab nololeed ku dhisan wadajir, iskaashi, iyo gacan qabasho.

Xilli dunidu sii kala fogaanayso, bulshooyin badanna ay la daalaa dhacayaan nolol ku saleysan danaysi iyo kali talisnimo, waxaa muhiim ah baahida loo qabo in aan dib u soo nooleyno dhaqanka qiimaha leh ee is caawinta Soomaaliyeed. Waa waqti aynu u baahanahay in aan si dhab ah isu garab istaagno, si aan u badbaadno, una horumarno.

## 1. ASALKA IS CAAWINTA SOOMAALIYEED: DHAQAN TAARIIKHI AH

Is caawintu ma aha arrin cusub oo laga soo dhoofiyey meel kale. Waa dhaqan soo jireen ah oo ka mid ah astaamaha ugu weyn ee lagu yaqaan bulshada Soomaaliyeed. Qarniyo ka hor ayay Soomaalidu si dabiici ah u lahaayeen habab ay isku garab istaagaan, xilliyada lagu jiro dhibaatooyinka ama xafladaha farxadda leh.

- Marka ay abaartu dhacdo, beeluhu waxay si wadajir ah ugu gurman jireen qoysaska ay saameysay abaarta, iyagoo u dira biyo, raashiin iyo xoolo.
- Guur doonku wuxuu ahaa hawl bulsheed; beel dhan ayaa ka qeyb qaadan jirtay ururinta maherka ama qalabka guriga ee arooska.
- Marka qof dhaawacmo ama dhib qabsado, si dhaqso ah ayaa loo abaabuli jiray qaaraan dhaqameed lagu caawinayo.

Is caawintaasi waxay ahayd nidaam nololeed ay dadku isku halleeyaan, iyadoo aysan jirin wax hay'ado rasmi ah ama dowlad awood buuxda leh.

## 2. DIINTA ISLAAMKA: TIIRKA IS GACAN QABASHADA

Diinta Islaamka, oo ah tiirka nolosha dadka Soomaaliyeed, waxay si cad oo joogto ah u faraysaa is caawin, isku naxariis, iyo isu gargaarid.

Quraanka Kariimka ah iyo Xadiisyada Nabiga (NNKH) waxay si toos ah u tilmaamayaan muhiimadda ay leedahay in Muslimku u gacan qabto walaalkiis Muslimka ah.

Sakada, sadaqada, kafaaleynta agoonta, daryeelka masaakiinta, iyo gurmadka dadka dhibaataysan, dhammaan waa amarro diini ah oo saldhig u ah is caawinta Soomaaliyeed.

## 3. XAALADDA MAANTA: MAXAAN UGU BAAHANAHAY IS CAAWIN?

Soomaaliya waxay ku jirtaa marxalad dib u kabasho ah oo adag. Waxaa jiray burbur siyaasadeed, colaado sokeeye, abaaro, fatahaado, sicir barar, iyo dhibaatooyin caafimaad oo baahsan. Inta badan shacabka waxay la daalaa dhacayaan duruufo culus.

- Kumannaan qoys ayaa ku barakacay xerooyin aan lahayn biyo nadiif ah, adeeg caafimaad, ama waxbarasho.
- Caruur badan ayaa ka haray iskuullada sababo la xiriira dhaqaale xumo.
- Waayeel iyo hooyooyin uur leh ayaa la daalaa dhacaya nolol aan cunto iyo daawo joogto ah lahayn.

Xaaladahan waxay na tusinayaan in is caawintu aysan ahayn doorasho, balse ay tahay waajib bulsho iyo mid diini ah. Haddii aan maanta isu gurman wayno, berri waxay noqon doontaa mid mugdi ah oo aan rajo lahayn.

# 4. DOORKA QURBOJOOGTA IYO HAY'ADAHA SAMAFALKA

Qurbajoogta Soomaaliyeed waxay si weyn oo kaalin muuqata ah ka qaataan is caawinta. Lacagaha ay u diraan ehelkooda, maalgelinta mashaariicda samafalka, iyo abuurista ururo gargaara bulshada ayaa badbaadiyay kumannaan qoys.

Sidoo kale, hay'ado sida Yasmin Foundation iyo kuwa kale ayaa si joogto ah u fuliya barnaamijyo kala duwan sida:

- Waxbarasho bilaash ah oo lagu taageerayo caruurta agoonta ah
- Caawinta dadka naafada ah iyo kuwa danyarta ah
- Biyo dhaamin iyo raashiin qaybin gobollada abaartu saameysay
- Dhismaha iskuullo, masaajidyo iyo xarumo caafimaad oo bulshada u adeegaya

Mashaariicdaasi waxay tusaale u yihiin in is caawinta la nidaamin karo, lana horumarin karo haddii loo hoggaansamo daahfurnaan iyo hufnaan.

# 5. MUSTAQBALKA: MAXAA LA GUDBOON BULSHADA SOOMAALIYEED?

Si is caawintu u noqoto nidaam joogto ah oo wax ku ool ah, waxaa lagama maarmaan ah in la sameeyo:

- Wacyigelin bulsheed: Warbaahinta, culimada, dhalinyarada, iyo bulshada rayidka ah waa inay kor u qaadaan baraarugga ku saabsan qiimaha is caawinta.
- Isu xilqaamid iyo tabarucaad: Qof walba wuxuu leeyahay wax uu ku caawin karo bulshada, ha noqoto lacag, waqti, ama xirfad.
- Hay'ado hufan iyo nidaamsan: Waxaa loo baahan yahay in hay'adaha samafalka lagu dhiso kalsooni, daahfurnaan, iyo isla xisaabtan.
- Kor u qaadidda fursadaha maxalliga ah: Waa in bulshada la baro xirfado, lana abuuro barnaamijyo shaqo abuur ah si dadka looga saaro ku tiirsanaanta gargaar joogto ah.

# GUNAANAD:

Is caawintu waa lafdhabarka bulshadeenna. Waa astaanta dadnimadeenna, waa tiirka guusheena, waana waddada kaliya ee aan ku gaari karno horumar waara.

***"Gacmo wadajir bay wax ku gooyaan."***

Aan noqono bulsho is jecel, is daryeesha, is garab taagan, si aan u dhisno Soomaaliya la isku hallayn karo, laguna faano.

**W/Q:** Danjire Maxamed Cali Nuur (Ameeriko)

*Aasaasaha ahna maamulaha hay'adda samafalka ee Yaasmiin*




**Xigashada Sawirka:** Puntland Post



Xigashada Sawirka: AI (Garaadka Macmalka ah)

# KAALINTA DHALINYARADA EE ISBEDELKA IYO HORUMARKA BULSHADA

"Aasaasayaashii SYL waa Dhalinyaro ku Suntan Taariikhda Soomaaliya"

Cabdiraxmaan Shiikhdoon

# HORDHAC

Dhalinyaradu waxa ay kaalin xooggan ka qaataan isbedelka iyo horumarka bulshada, taas oo ay sabab u tahay awoodda iyo hal-abuurka ay leeyihiin dhalinyaradu. Waxaa lagu tilmaamaa dhalinyaradu in ay yihiin laf-dhabarta iyo mustaqbalka bulshada, waayo bulsho kasta waxa uu mustaqbalkeedu ku xiran yahay heerka tacliinta, fekerka, hal-abuurka iyo hab-dhaqanka dhalinyarada. Firfircoonida, hamiga iyo xamaasadda dhalinyaradu waxa ay sabab u noqon kartaa in ay noqdaan mashiinka/matoorka dhaqaajiya isbedelka iyo horumarka bulshada, iyaga oo isbedelka bulshada uga qayb qaadan kara siyaabo kala duwan, sida toosinta dhaqanka, hal-abuurka, iyo ka-qayb-galka firfircoon ee arrimaha bulshada iyo siyaasadda. Qormadaan waxa aan si kooban uga hadlaynaa kaalinta ay dhalinyaradu ka qaadan karto isbedelka iyo horumarka bulshada, iyo caqabada haysta dhalinyarada Soomaaliyeed si ay kaalin mug leh oo muuqata uga qaataan horumarinta bulshada.

# DHALINYARADA IYO ISBEDELKA

Sida uu qur'aanku tilmaamay(30:54), nolosha dadku waxa ay martaa saddex heer oo ay midda ugu horaysa ay tahay taagdaro, midda xigtana awoodda iyo tan ugu dambaysa oo ah gabow iyo taagdaro. Haddaba, dhalinyaradu waa heerka labaad ee ay nolasha aadamuhu ugu awooda badan tahay, jir ahaan iyo maskax ahaanba. In kasta oo aan laysku af garan d'ada dhalinyarada, haddana, inta badan da'ada dhalinyada waxaa lagu sheegaa inta u dhaxaysa 15 sanno ilaa iyo 35/40 sanno.

Isbedelka bulshadu waa doorsoon ku dhaca bulsho, kaas oo wax ka bedela sidii ay bulshadu horey u ahaan jirtay, gaar ahaan dhinacyada dhaqanka, xeerarka, qaab-dhismeedka, kaalinta hawl-gudashada, isku-xirnaanta, horumarka, dhaqaalaha, tiknoolijiyada, iyo dhinacyo kale, kaas oo noqon kara mid togan(+) iyo mid taban(-). Dhinaca kale, horumarku waa isbedelka wanaajiya tayada iyo bed-qabka nolosha bulshada, dhaqan-dhaqaalaha, tiknooliyada iyo mustaqbal bulshada. Ibnu Khaldun waxa uu sheegay in bulshadu iyo unidubа ay joogto u tahay isbedel iyo doorsoon.Waxa macne u yeela isbedelka waa waxbarashada, sida uu tilmaamayo hal-kudhiga Mandela ee ahaa:" Waxbarashadu waa hubka ugu awoodda badan ee lagu bedeli karo dunida". Isbedelka bulshadu waxa uu noqon karaa mid soo dhutiya(gradual) oo marba marka ka dambeeya keena horumar la taaban karo, iyo mid si deg deg ah u dhaca (kacaan-Revolution-).

Sidoo kale waxa uu noqon karaa mid qorshaysan iyo mid aan qorshe lahayn.Isbedelka qorshaysan waxaa tusaale u ah Yoolasha Horumarka Waara (SDG), kaas oo ka kooban 17 qodob sida, ciribtirka faqriga, caafimaadka, waxbarasho tayo leh, kordhinta dhaqaalaha, sinaanta, tamarta iyo kuwo kale oo la xiriira hagaajinta nolosha aadamaha. Dhinaca kale, isbedelkii keenay maamulka Khaatumo, waxa uu ahaa kacdoon bulsho oo aan qorshaysnayn. kacdoonkaas, waxaa garwadeen u ahaa dhalinyaro keentay in guul laga gaaro mideynta bulsho ay ku habsatay khilaaf balaaran iyo kala taageerida siyaasaddo ku hardamay maamulka dhulka Khaatumo. Mideynta bulshada khaatumo waxaa guul buuxda ka gaari waayey siyaasiyiin iyo hogaamiyaasha dhaqanka oo magac weyn ku leh Soomaaliya iyo gudaha deegaanada Khaatumo. Arrintaas waxa ay tulaase muuqda u tahay awoodda iyo kartida dhalinyarada, marka ay dhexdooda ka jirto midnimo, isku-duubni iyo yool la higsanayo. Kacdoonkaasi waxa sabab u ahaa dhacdooyin fool xun oo si isdaba joog ah uga dhacayey magaalada Laascaanood. Arrintaasi waxa ay u dhacday sidii uu sawiray gabyaagii Axmed Ismaaciil (Qaasin) oo tuduc ka mid ah gabay uu tiriyey ku yiri:" **Maruun uun buu daboolka iska rogi doob la quudhsadaye"**.

Dhowaan (22-kii June 2025) waxaa magaalada Muqdishu lagu qabtay shir ay ka soo qayb galeen dhalinyaro Soomaaliyeed oo ka kala yimi inta badan gobolada dalka iyo dibadiisa. Shirku waxa uu diirada saaray dhibaatada tahriibka iyo xalkeeda, taas oo ah ayaan-darada ugu badan ee maanta haysata dhalinta Soomaaliyeed (mid ku haminaya, mid ku hawlan, mid ku hungoobay iyo mid ku haligmay). Shirka waxa soo qaban qaabiyey Golaha Muwaadin oo ah gole dhalinyaro oo ka jira Muqdisho. Halku-dhiga shirweynaha qaran ee dhalinyaradu waxa uu ahaa **"Safarka Geerida iyo Sahayda Dhalinyarada"**. Shirka waxa lagu gorfeeyey dodo dhowr ah oo ay ka mid yihiin, dhibaatada tahriibka, yagleelida hayb-qaran, shaqo-abuurka, mideynta dhalinyarada, ka-qayb-qaadasha siyaasadda iyo waxbarista iyo wacyi-gelinta dhalinta. Arrintani waa hindise bilow ah oo u baahan gardaadin, garab-is-taag iyo horumarin.

Shirka waxa ka soo baxay talooyin dhowr ah oo ku aadan dhibaatada tahriibka, qabyaalada, shaqo la'aanta, joojinta hadalada xanafta leh ee bulshada kala dilaya, helida hogaamiye aragti iyo karti leh, iyo dhalinyarada oo si xooggan uga qayb qaadata jihaynta ayaaha iyo sidyaasadda dalka. Qodobada shirka looga doodday waxa ay ka mid yihiin istiraajiyadaha siyaasadda qaran ee dhalinyara ee  dawlada Soomaaliya. Hase yeeshee, waxa loo baahan yahay in la dhaqan geliyo siyaasadda qaran ee dhlinyarada oo aysan noqon erayo macaan oo ku qoran warqado qurux badan. Maahmaah Soomaaliyeed ayaa oranaysa: ***"Dhalaanka dhunkasho kuma filnee, dhiil baa caano loogu shubaa".***

Bishii May 2025, waxaa magaalada Gaalkacyo ka curtay kacaan dhalinyaro oo u qaareemayey horumarinta magaalada Gaalkacyo iyo wax ka qabashada dhibaatooyinka ka jirta Gaalkacyo oo ay ugu horeyso dhibaatada xilli roobaadka ka dhalata biyaha roobka, horumartina garoonka diyaaradaha iyo wadada isku xirta Gaalkacyo iyo Bacaadweyn. Arrintaas waxa ay keentay in wasiiro iyo xildhibaano ka tirsan dowlad-goboleedka Puntland ay tagaan magaalada Gaalkacyo, kuwaas oo dejiyey kacdoonkii dhalinyarada. Dhinaca Kalena, waxa ay sameeyeen balan-qaado wax looga qabanayo dhibaatada keentay cabashada. Madaxweynaha Puntland Mudane, Siciid Cabdullaahi Deni ayaa dhagax dhigay dhismaha wadada isku xirta Bacaadweyn iyo Gaalkacyo, taas oo ka mid ah waxyaabaha ugu waaweyn ee cabashada keenay, gaar ahaan is-fahan la'aanta u dhexaysa Dowlada Federalka iyo Puntland oo sababay u noqotay in uu fuli-waayo  mushruuc uu bixiyey Bangiga Horumarinta Africa oo loogu talogalay in lagu dhiso wadada u dhaxaysa Gaalkacyo iyo Bacaadweyn. Taasina waa tusaale ku saabsan isbedelka ay dhalinyaradu horseedka u tahay. Xaaji Aadan Af-qalooc, waxa uu dhalinyarada kula dardaarmay:

***"Umaddaan shabaabkeedu hanan waa u ayaan xuma e Inamiyo hablahaba waxaad tihiin aarankii kacaye Itaal gabe dadkiinii hore waydin aragtaane Idinkaa amaanada xilkii eeggan qaabilaye "***

Taariikhda Soomaaliya waxaa baal dahab ah kaga jira dhaqdhaqaaqii dhalinyarada  ee SYC/SYL, kaas oo ku bilowday gole (club) dhalinyaro oo la aasaasay 15 May 1943 (Somali Youth Club-SYC), ka dibna isku rogay xisbi siyaasaddeed April 1947 (Somali Youth League-SYL). Maalintaas oo noqotay maalin taariikh leh oo ku jirta taariikhda Soomaaliya, sida uu Trunji ku qoray buuggiisa (Somalia: The Untold History). Arrimaha  uu qoraalkani ka soo dheeganayo SYL ee ugu muhiimsan waa in ay aasaasayaashii ururka SYL ay ahaayeen dhalinyaro, gaar ahaan maskaxdii ka dambaysay dhisida ururka Yaasiin Xaaji Cali Sharmaarke oo da'diisu ahayd 26 sanno jir. Sidoo kale, in ay SYC lahayd labo ujeeddo oo ahaa mideynta Soomaalida iyo waxbarista iyo wacyigelinta dhalinyarada ee waxbarashada casriga ah oo ku salaysan dhaqanka Soomaalida, si loo gaaro xoriyad. Waxaa kale oo xusid mudan, in aasaasayaasha ururka SYL ay ahaayeen dad aragti fog, oo leh hogo-tusaaleyn(coaching skills) ay dadka si fudud wax ugu fahansiiyaan. Tusaale ahan, dhawaaqa eragya "Club" ayaa  u ekaaday erayga "Kilaab" oo Carabi ah, kaas oo macno ahaan ah "Eey". Arrintaasi waxa ay u cuntami weyday dadka Soomaaliyeed oo xilligaas ahaa dad dhaqankooda ku adag. Yaasiin Xaaji markii uu fahmay dhibaatada ka dhalan karta adeegsiga eraygaas (club) ee  laga gilgishay, waxa uu adeegsaday erayga "Naadi" oo af Carabi ah, kaas oo la macno ah erayga "Club" si looga hortago xasaasiyadda dhaqanka (Cultural sensitivity) ee ka dhalatay adeegsiga erayga "club".  Sida uu tilmaamay Trunji (Somalia: The Untold History), Yaasiin waxa uu ahaa nin leh wacyi/garasho siyaasaddeed, sidoo kale waxa uu fahmay in aan la inkiri karin  in qaabiilku uu arrin kasta u yahay xudun. Sidaas darteed ayuu Yaasiin uga telinayey mus-dambeedka. Aasaasayaashii  ururka SYL ma lahayn aqoon waxbarasho oo toos ah (formal education), hase yeeshee waxa ay lahaayeen karti iyo hoogaamin uu rabi geliy, taas oo ay ku gaareen ujeeddadoodii ahayd xoriyada dalka. Sida uu yiri Abwaan Cali Sugule:"

***"Af qalaad aqoontu, Miyaa? Maya, Maya Ma ahee waa intuu qof ba Eebbe geshaa Ayey nala tahay annagee"***

Ka qayb-qaadashada isbedelka iyo horumarinta bulshadu ma aha in aad hesho mansab siyasaasadeed ama aad gurato miraha isbedelka. Sakhaawa-diin, Yaasiin iyo rag kale oo ka mid ahaa aasaasayaashii ma guran mirihii xoriyada, hase yeeshee waxa ay gundhig u ahaayeen aasaaskii ururkii SYL iyo xoriyadii ka dhalatay dalka Soomaaliya. Dhinaca kale, Sida uu Jimcaale ku qoray buuggiisa (Dhacdooyinka Ma Deganayaasha Geeska Afrika) caqabadaha soo wajahay ururkii SYL waxaa ugu weynaa in uu gumaysigu sameeyey urur lagu kala qaybinayo midnimada dhalinyardii Soomaaliyeed. Sidoo kale Trunji waxaa uu ku sheegay buuggiisa (Somalia: The Untold History) in mid ka mid ah

aasaasayaashii SYC ay ka baxeen xayndaabkii ururka, oo ay ka soo dhex muuqdeen ururo kale.

## MAXAY YIHIIN CAQABADAHA HAYSTA DHALINYARADA SOOMAALIYEED?

Waxaa jira caqabado badan oo haysta dhalinyarada Soomaaliyeed, kuwaas oo hortaagan inay dhalinyarada Soomaaliyeed isku-xirmaan oo ay ka qayb qaataan isbedelka iyo horumarinta dalka. Isbedelka hab-fekerka ayaa raad taban ku yeeshay dhalinyarada Soomaaliya (Xagjir iyo ilxaad), waana tan sababtay in qaar ka mid ah dhalinyarada Soomaaliyeed lagu qanciyo in ay is-qarxiyaan ama dilaan qof Soomaaliyeed ama dhinaca kale inkiraan jiritaanka Alle ama aaminaan aragtiyo kale oo falsafadaysan oo ka fog diinta Islaamka iyo dhaqanka suuban ee lagu soo barbaariyey. Daroogada ayaa ka mid ah waxyaabaha saameeyay mustaqbalka dhalinyarada.

Tahriibta ayaa ka mid ah caqabadaha ugu waaweyn ee ku habsaday dhalinyarada. kala qobqobnaanta dalka iyo hab-dhaqanka taban ee siyaasiyiinta oo aan kobcinayn garaadka iyo kartida dhalinyarada, ayaa iyana ka mid ah caqabadaha haysta dhalinta. Baraha bulshada oo loo adeegsaday si aan waxtar lahayn ayaa lumiyey qiyamka, iyo kartidii dhalinyada ku walaftay adeegsiga baraha bulshadada. Dhalinyarada oo lagu kiciyo dhibaatooyin horey u dhacay oo xal laga soo gaaray ama la alifay, ayaa cuqdad iyo xanuun ku reebta maskaxda dhalinyarada. Taas oo ay inta badan ay siyaasiyiintu u adeegsadaan in ay mansab ku helaan kicinta dhalinyarada.

Dhalinyarada oo aan fursad loo siin ka qayb-galka siyaasada ayaa ka mid ah waxyaabaha ragaadiyey hamigga iyo hanka dhalinyarada Soomaaliyeed. Sannadkii 1994-tii ayaa doorasho lagu qabtay magaalada Qardho, taas oo u dhexaysay Cabdullahi Yuusuf Axmed iyo Maxamed Abshir Muuse oo ku loolamayey xilka guddoomiyaha SSDF. Nin ka mid ahaa ergadii shirka, ayaa sheegay in lixdameeyadii (1960-dii), iyagoo dhalinyaro da' yar ah ay maalin arkeen General Maxamed Abshir (Taliyihii ugu horeeyey ee booliska Soomaaliya) oo keligii gaari ku dhex maraya magaalada Muqdisho, ka dibna ayey ugu yeeraan: "General Aguiyi", oo ahaa jeneraal caan ah oo dalka Nayjeeri ku qabsaday inqilab sannadkii 1966-kii. Genreal Abshir, inta uu soo noqday, oo u yimi dhalinyaradii ayuu ku yiri: **"Madaxdii berito ayaad tihiin eee joojiya gardarada".** Ninka sheekadan ka sheekeeyey 30 sanno ka dib, oo xilligaas ahaa nin weyn oo aan madaxa tin ugu harin ayaa yiri: **" Ilaa iyo lixdankii waxaan ku jirnaa waxaad tihiin madaxdii beri, beri ma dhamaato miyaa?"**. Ka warama siyaasiyiinta tan iyo shirkii Carta ku jiray ganoonka siyaasadda oo aan ilaa iyo maanta ogolayn in uu baneeyo booska siyaasadda, si ay dhalinyaradu u hesho kaalin ay uga qayb qaataan isbedelka siyaasadda iyo horumarka. Dhalinyada Soomaaliyeed waa ciyaaryahano firfircoon oo ka tirsan kooxaha siyaasadda, laakiin nasiib daro marna lama soo safo ciyaarta siyaasadda oo ciyaar kasta oo waxa ay dhammaataa iyaga oo sugaya bedel. Haddaba, oraahda ah **"dhalinyaradu waa madaxdii beri" waxa ay la mid tahay, halku-dhig berigii hore lagu qori jiray goobaha ganacsiga oo ahaa:"** Maanta deyn ma leh, beri haa", taas oo beri ka dhigaysa maalin aan la gaari karin.

## GUNAANUDKA

Dhalinyaradu waa laf-dhabarta, iyo astaanta muujinaysa mustaqbalka bulsho kasta, gaar ahaan bulsho ay dhalinyaradeedu ka kooban tahay 70% tirada dadka, sida Soomaaliya oo kale. Waa arrin aan la inkiri karin cududda, kartida iyo hal-abuurka dhalinyarada Soomaaliyeed. Haddaba, si looga faa'iidaysto awoodda iyo maskaxda dhalinyarada, waa in xal loo helo dhibaatooyinka kor lagu soo sheegay iyo kuwo kale. Sidoo kale, shirarka iyo isku-xirnaanta dhalinyarada ayaa lama huraan u ah in ay dhaalinyaradu mideeyaan maskaxdooda iyo muruqooda. Dhalinyaradu waa in ay ogaadaan in isbedelkoodu uu noqodo mid leh ujeeddo oo ay hagayso fikrad ka fog fudeyd iyo laab-la-kac oo aan rabshad ku dhisnayn. Nin dhalinyaro ahaa oo ka mid ahaa dadkii gumeysidiidka ahaa ee dalka Hindiya, ayaa yiri:" Qaraxa iyo bistooladu ma keenaan kacaan. Seefta kacaanka waxaa afeeya fikrad adag". Sidaas darteed ayaa loo bahan yahay isbedel iyo horumar ku curta si nabad iyo xasilooni ah oo ay dhalinyaradu horseed u tahay.

**W/Q:** Cabdiraxmaan Shiikhdoon

Xigashada Sawirka: AI (Garaadka Macmalka ah)



# KANADA IYO GOONI-GOOSADKA QUEBEC: MAXAY SOOMAALIDU KA BARAN KARAAN?

Cabdirashiid Khaliif Xaashi

1-da Luulyo, waa maalin ay dalalka Kanada iyo Soomaaliya xusaan maalmahooda qaran — Kanada waxay u dabbaaldegtey157 sano tan iyo aasaaskii 1867, halka Soomaaliya ay u dabbaaldegtey 65 sano tan iyo xorriyaddii 1960. Labaduba waa dalal federaal ah oo la tacaalayey — mid kasta si gaar ah — arrimaha midnimada qaran iyo gooni-u-goosadka.

Kanada, gaar ahaan gobolka Québec oo ay deggan yihiin inta badan dadka afka Faransiiska ku hadla — kuna abtirsada madhabta Kaatooligga — ayaa tan iyo 1960-kii u ololeynayay madax-bannaani ama ugu yaraan maamul iyo aqoonsi gaar ah. Soomaaliya, dhinaceeda, waxaa muddo dheer ka jiray dadaallo gooni-u-goosad ah oo ka imaanaya gobollada Waqooyi, gaar ahaan suyaasiyiin u badan beelaha Isaaq, kuwaas oo ku adkaysanayey ilaa 1991 in ay samaystaan Jamhuuriyadda Somaliland.

Maqaalkani waa isku day aan ku eegi doono sida ay dowlado kala dambeeyey oo Kanada ah ay u wajahayeen tabashada Québec iyo sida ay ugu dedaaleen in ay dalka mideeyaan, iyadoo laga baran karo duruus la xiriirta sida Soomaalidu ay u maarayn karaan xaaladda wadajirka iyo kala go'a.

## AASAASKA KALA-DUWANAANTA IYO TABASHADA QUÉBEC

Markii Kanada la aasaasay 1867, Québec waxaa loo oggolaaday awoodo gaar ah oo la xiriira waxbarashada, diinta, luqadda, iyo sharciyada madaniga ah, si loo ilaaliyo jiritaanka dadka Faransiiska ku hadla. Laakiin laga soo bilaabo 1960-kii, waxaa kacay dareen gooni goosad ah iyo cabashooyin la xiriira in Quebec ay hesho aqoonsi buuxa ama awood siyaasadeed oo ka badan intii dastuurku hore u oggolaaday.

Dareenkaas waxaa xigey in 1968 la aasaaso xisbiga Parti Québécois (PQ), oo ujeedkiisu ahaa doonista madax-bannaani buuxda.

Si loo dejiyo cabashadaas, Dowladda Federaalka ee Kanada waxay 1969-kii sharci ka dhigtay Xeerka Luqadaha Qaranka oo Faransiis iyo Ingiriis ka dhigay luqadaha rasmiga ah. Tani waxay keentay in adeegyada dowladda, sharciyada, maxkamadaha, iyo qoraallada rasmiga ah lagu bixiyo labada luqadood.

Inkastoo dadka Faransiiska ku hadla yihiin ku dhowaad 22%, halka dadka Ingiriisiga ku hadla yihiin 75%, dowladda Kanada waxay sannad kasta ku bixisaa in ka badan 1.5 bilyan oo dollar-ka Kanadiyaanka si luqadda Faransiisku u ahaato mid maqaam buuxa leh — taas oo ahayd dadaal istiraatiiji ah oo lagu doonayay in dadka Faransiiska ku hadla ay dalka iimaansadaan oo dareemaan xuquuq iyo ka mid ahaansho.

## ISKU-DAYADA DASTUURKA IYO QARAARADA SIYAASADEED

1982-dii, Kanada waxay meel marisay qaybo dastuurka ka mid ah oo lama taabtaan laga dhigay oo lagu magacaabo Charter of Rights and Freedoms, ama 'Axdiga Xuquuqaha iyo Xorriyadaha' oo lagu xoojiyay xuquuqaha dastuurka ku qornaa ee luqadda iyo waxbarashada dadka laga tirada badan yahay. Laakiin Québec waa ay diiday in ay saxiixdo dastuurkaas, iyada oo ka biyo diiddey arrimo ay ka mid ahaayeen in aan si gaar ah dadka Faransiiska ku hadla loo aqoonsan.

Waxaa xigay labo heshiis siyaasadeed oo waaweyn oo Dowladda Federaalka ee Kanada iyo dowladaha xubnaha ka ah ay isla diyaariyeen ama ka tashadeen kuwaas oo kala ahaa Meech Lake Accord (1987) – heshiiskaas oo doonayay in Québec lagu aqoonsado "bulsho gaar ah" lagana siiyo saameyn dheeraad ah. Waxaa isna xigey Charlottetown Accord (1992) – oo lahaa qodobo dheeraad ah oo ku saabsan xuquuqaha bulshooyinka iyo awood qeybsiga. Labada heshiisba way fashilmeen. Meech Lake waxaa diiday laba gobol oo aan Québec ahayn,

halka Charlottetown ay shacabka Kanada oo dhan — Québec-na ay ku jirto — ay ku diideen afti guud.
Arrimahaasna waxa ay muujinayaan in isku dayo dastuuri ah, doodo siyaasadeed iyo afti-dadweynaba lagu dayey isku haynta dalkaasi Kanada.

## AFTI-DII QUEBEC EE 1995

Sanadkii 1995-dii, Québec waxay qabatay afti dadweyne si loogu kala doorto in ay Kanada ka sii mid ahaadaan ama in ay ka go'aan. Waxaa kasoo baxay natiijo aad isugu dhaw oo 49.4% waxay u codeeyeen in gobalku uu madax-bannaani helo, halka 50.6% ay u codeeyeen midnimo. Taasi waxay noqotay darsin lama ilaawaan ah, oo dowladda iyo Kanadiyaanka midnimada doonaya ay ugu caddaado, in Quebec ay go'id qarka u saaran tahay.

Si taas looga daba tagana, baarlamaanka Kanada ayaa qaraar ku soosaaray in Quebec loo aqoonsaday in ay tahay "bulsho gaar ah" ama distinct society — sida dadka Faransiiska ku hadla ay dalbanayeen.

Waxaa isna baarlamaanka Kanada ansixiyey sharci dhigaya isbeddel kasta oo dastuur-ka ah in uu u baahan yahay oggolaanshaha gobollada muhiimka ah — oo ay ku jirto Québec.

1998-dii, Maxkamadda Sare ee Kanada waxay iyana go'aamisay in gobolna aanu kaligii uga bixi karin qaranka Kanada, balse haddii afti dadweyne oo hufan ay dhacdo (oo gooni isutaag) ku salaysan oo dadka doonayaan madax-bannaani, in dowlada federaalka ay waajib ku tahay wadahal kala gurasho keeni kara in ay furto.

Kanada waxaa kale oo dhaqan siyaasadeed ka noqday — wixii loo soo gaarey 1970-yadii intii doodda gooni isu taaggu bilaabatay — in siyaasiyiinta ra'iisul Wasaaraha raadinaya ay noqdaan kuwo afka Faransiiska ku hadla — oo 10-kii ra'iisul wasaare ee u danbeeyey 5 ayaa asal ahaan ahaa Faransiis; midna Quebec ayuu ka soo jeedey luuqadda Faransiiskana wuu ku hadli jirey— in kasta oo asal ahaan aanu Faransis ahayn.

Dhanka, dhaqaalaha Québec waxay sannad kasta heshaa gargaar dhaqaale oo ka badan 13 bilyan dollar, oo ka yimaada barnaamijka equalization payments — ama lacag dowladda dhexe ka soo uruuriso gobollada dhaqaalaha fiican si loogu caawiyo kuwa liita.

Québec waxaa kale oo ay leedahay oo aysan gobolada kale haysan, qorshe hawlgab u gaar ah (Quebec Pension Plan); canshuur dakhli u gaar ah; xaq u gaar ah in ay doorato muhaajiriinta imanaya gobolka. Dowladda Kanada waxay sidoo kale u oggolaatay Québec in ay ka madax-bannaanaato barnaamijyo qaran ama gobol kasta dowladda federalku ay ka fuliso — sida daryeelka carruurta ama caafimaadka — iyada oo Quebec ay weli helaysey lacagtii federaalka.

Dhammaan dadaaladaas dowladda dhexe ee Kanada waxay muujinayaan sida 50 sano ku dhawaad ay Kanada ugu dadaalayso in ay dalkeeda midnimadiisa ka mira dhaliso iyada daawada ugu weyn ee ay isticmaalayso ay ahayd in Quebec tanasul loo sameeyo.

## MAXAY SOOMAALIDU KA BARAN KARTAA?

Maaddaama ay Soomaaliya ka jirto deegaan ama beel siyaasiyiintoodu ay doonayaan in ay ka go'aan jamhuuriyadda inteeda kale, su'aashu waxay noqonaysaa sidee arrinta gooni isu taagga ay Soomaali xal ugu heli kartaa, maxayse Soomaalidu ka baran kartaa Kanada iyo Quebec.

Sida muuqata, xaaladaha Soomaaliya iyo Kanada waa kala duwan yihiin. Kanada waa dal xasilloon oo hodan ah oo awood u leh in ay siiso gobol tabasho qaba ama gadoodsan , arrimo ay ka mid yihiin: aqoonsi sharci ah, maamul gaar ah, gargaar dhaqaale, wada hadal joogto ah.

Sida dad badani ay dareemeen, Soomaaliya waxay ka gaabisay in ay xal u hesho gooni goosadka Somaliland ama in ay ka shaqayso

kala-gurasho ama xitaa ay wada hadallo dhab ah la galo — meeshii ay doonaan ha ku dhamaadaane.

Haddaba, casharka ugu weyn ee laga qaadan karo arrimaha Kanada iyo Quebec waa in ay muhiim tahay in madaxda qaran aysan inkirin, iskana indha tirin tabashooyinka qaybo qaranka ka mid ah — taasina ay keeneyso  in lagu dhawaado raadinta xalka — sida ay muujinayaan tallaaboyinka ay Kanada u qaadday qancinta Quebec.

Sidaas darteen, siyaasiyiinta Soomaaliyeed ee midnimada aaminsan waxaa la gudboon in ay ubbo u biyeystaan fahamka dareenka iyo doonista siyaasiyiinta iyo dadka Somaliland ee kala go'a doonaya — kaddibna ay is weydiiyaan waxa ay doonayaan in ay u huraan ama ku gataan midnimada. Laakiin, ma shaqyn karto doodda ah: iga go'imeysid kuna qancin maayo.

**W/Q:** Cabdirashiid Khaliif Xaashi;
*Qoruhu waa Wasiir hore; fallanqeeye arrimaha  Soomaaliya — waxna ku bartay kuna noolaa Canada muddo 35 ka badan.*



**Xigashada Sawirka:** AI (Garaadka Macmalka ah)

# MAXAY YIHIIN CAQABADAHA LAGA GUDBI LA’ YAHAY EE DOORASHOOYINKA SOOMAALIYA?

Dr. Maxamed Cali Faarax



Xigashada Sawirka: Reuters

# HORDHAC

Horaanta sannadka 2026, waxa lagu wada in ay Soomaaliya ka dhacdo doorashooyinka madaxweynaha iyo golayaasha baarlamaanka ee Dowladda Faderaalka Soomaaliya. Hase yeeshee, waxa aan jirin hannaan dooroasho oo lagu mideysan yahay, taas oo ay sabab u tahay hindisaha cusub ee Madaxweyne Xasan Shiikh Maxamuud uu ku doonayo in dalka ay ka dhacdo doorasho qof iyo cod ah. Arrintaas waxaa ka biyo-diiday siyaasiyiinta mucaaradka ah, iyo dowlad goboleedyada Puntland iyo Jubaland. In kasta oo hannaanka doorashada ee qof iyo cod ay Soomaaliya ka bilaabatay xilli hore oo ay hurmuud u ahayd Afrika, haddana waxaa jirey caqabado markasta dhici jirey. Taas waxaa sii dheer, tan iyo curashadii Jamhuuriyada Saddexaad ee Soomaaliya (Carta 2000), waxa jiray doorasho ay udub dhexaad u yihiin ergo ama xildhibaanada golaha baarlamaanka oo lagu soo xulo habka wax-qaybsiga ee beelaha Soomaaliyeed (4.5). Sannadadii ugu dambeeyey waxaa jirtay in isbedel lagu sameeyey habka xulashada xubnaha golayaasha baarlamaanka, hase yeeshee ma noqon mid la mahadiyo, kolkii ay gacanta u gashay madaxda dowlad-goboleedyada oo iyagu dantooda ku jaan-gooyey. Qormadaan waxa ay diiradda saaraysaa taariikh kooban oo ku saabsan doorashooyinkii Soomaaliya ka hanaqaaday, si cashar looga barto, caqabadaha jira imminka iyo sida looga gudbi karo.

# RAAD-RAACA TAARIIKHDA DOORASHOOYINKA SOOMAALIYA

Markii ugu horreysay, waxa ay doorashooyinku ka bilowdeen geyiga Soomaaliyeed xilligii lagu jiray xukun-hoosaadka (trusteeship). Ugu horreyna waxaa lagu bilaabay abaabul hannaan doorasho oo lagu soo dooranayo golayaasha deegaanka, si ay bulshada Soomaaliyeed ugu diyaar garoobaan xoriyadda iyo doorashooyin ka dhaca dalka marka la gaaro xorriyada. Waxaa la qorey xeerarka doorashooyinka ee Soomaaliyeed (The Electoral legislations of Somalia, 1953-1969) oo tifaftirey Maarten Halff. Mudadii u dhexaysay 1953-1969, waxaa dalka Soomaaliya ka qabsoomay 10 doorashoo oo lix ka mid ah la doortay golayaasha sharci-dejinta (Legislative councils), halka afar jeerna la soo doortay golayaasha deegaanka (Municipal councils). Markii ugu horreysay ee la qabto doorasho ay haweenku codkooda ka dhiibtaan waxa ay ahayd 20-kii Oktoober 1958-dii, taas oo ka dhacday goballada koonfurta ee Soomaaliya ee uu Talyaanigu gumeysan jiray. Horraantii 1954-tii, waxaa dalka ka dhacay doorashadii ugu horraysay ee lagu dooranayo golayaasha deegaanka, taasoo kuraastii ugu badnayd uu ku guulaystay Xisbiga Dhallinyarada Soomaaliyeed (SYL). Arrintaasi waxa ay dadka Soomaaliyeed ku abuurtay kalsooni ah in Maamulkii Xukun-hoosaadka (Trusteeship administration) uu fulinayo go'aankii Qaramada Midoobay ay gaareen sannadkii 1955-tii, kaas oo ahaa in Soomaaliya la gaarsiiyo xoriyad buuxada bartamana Sannadka 1960-ka. Sidoo kale waxa ay bedeshay siyaasaddii ururka SYL ee ka soo horjeeday dowlada Talyaaniga ee garwadeenka ka ahayd xukun-hoosaaska, isagoo caddeeyey in ay la shaqayn doonaan Talyaaniga, maadaama ay muuqato inuu hayo tubtii uu dalku gobannimo iyo madaxbannaani ku gaari laha, sida uu ku qoray Liiqliiqato buuggiisa (Taariikhda Soomaaliya).

Doorashadii ugu horreysay ee golaha baarlamaanku waxa ay Soomaaliya ka qabsoontay bishii Maarso 1956-kii, taas oo lagu soo doortay 70 xildhibaan oo 10 ka mid ah laga soo magacaabay Jaaliyadaha shisheeye ee dalka degganaa. Xisbiga SYL ayaa helay 43 kursi, halka uu xisbiga Digil iyo Mirifle ka helay 13 kursi. Xubnaha soo haray waxaa helay dhowr xisbi oo yar yar. Cabdullaahi Ciise oo ka tirsanaa xisbiga SYL ayaa loo doortay inuu soo dhiso dowlad Soomaaliyeed oo maamusha arrimaha gudaha dalka. Inkasta oo ay doorashadaasi ku dhacday hannaan dimuqraadi ah oo ku salaysan qof iyo cod, haddana dad fara badan ayaan ka dhex muuqan dowladii ay SYL soo dhistay, taas oo abuurtay in laga niyad-jabo hab-dhaqanka madaxdii SYL. Arrintaasi waxa ay keentay in uu kala qaybsamo xisbigii oo uu samaysmo xisbi kale oo la baxay Xisbiga Soomaliweyn (GSL) sida lagu qoray buugga Taariikhda Soomaaliya ee Liiqliiqato.

Durbadii waxaa la dareemay in xisbigii SYL uu talada dalka marooqsaday, taas oo keentay in ay kalsooni daro ka dhex abuuranto xisbiyadii Soomaaliyeed. Dhacdadaasi waa meeshii ugu horreysay ee uu ka bilowday qallooca doorashooyinka Soomaaliya galay oo ilaa iyo maanta la saxi la'yahay. Sannadkii 1959-kii oo ay dhacday doorashadii ugu dambaysay intii ay dowladda Talyaanigu dalka maamulaysay, xisbiga SYL waxa uu helay 83 ka mid ah 90-kii kursi ee loo tartamayey, natiijadaas oo ay sabab u ahayd maamulka SYL oo xirxiray boqollaal ka tirsanaa xisbiyadii ka soo horjeeday ee uu ugu weynaa xisbiga Soomaaliweyn (GSL).

Xukuumadii Cabdullaahi Ciise muddo kooban ayay ku socotay dardar, iyo xamaasad ay qiiro ku dheehan tahay, waxaase durbadiiba soo food saaray dhibaatooyin siyaasadeed, dhaqaale iyo bulsho. Xisbigii SLY waxa uu ka weecday himiladii ahayd gobannimadoonka iyo midaynta Qaranka Soomaaliyeed oo uu muddo 15 sanno ah u soo halgamayay. Sidoo kale waxaa xisbigii SYL ka dhex dhashay muran iyo awood-marooqsi beelaysan, taas oo keentay in ay taageerayaashii xisbigu u kala leexdaan jilibyo. Arrintaasi waxa ay wiiqday midnimadii halganka gobonimodoonka, waxayna yaraysay kalsoonidii bulshadu u qabtay ururka SYL. Hogaanka ururka oo lagu heshiin waayey, ayaa ugu dambeyntii la doortay Maxamed Xaaji Xuseen oo dalka Masar waxbarasho ugu maqnaa.

Dhinaca kale, gobollada Waqooyi ee Ingiriisku maamulayay lagama ogolayn xisbiyada siyaasadda iyo doorashooyinka intii ka horeysay sannadkii 1959-kii. Dadka maamulka ka qayb galaya, dowlada Ingiriiska ayaa qaabiillada ka soo xulan jirtay. Doorashadii ugu horreysay waxa ay gobollada waqooyi ka dhacday sanadkii 1959-kii, taasoo uu qaadacay Xisbigii SNL, waxaana xigtay doorashadii bishii Febraayo 1960-kii, oo loo tartamay 33 xubnood oo baarlamaanku ka koobnaa. Xisbiga SNL oo uu hoggaaminayay Maxamed Xaaji Ibraahim Cigaal, ayaa ku guulaystay 20 ka mid ah 33-da xubnood oo baarlamaanku ka koobnaa, isla doorashadaas Xisbigii la oran jiray USP-na uu helay 12 xubnood, halka xisbigii NUF uu ka helay 1 xubin oo keliya.

Kadib dilkii madaxweynihii Soomaaliya Cabdirashiid Cali Sharmarke bishii Oktoobar 1969, ciidamada qalabka sida ee Soomaaliya ayaa afgambi ku qabsaday talada dalka, waxaana hoggaanka la wareegay Jeneraal Maxamed Siyaad Barre. Afgambigaas wuxuu meesha ka saaray nidaamkii dimuqraadiga ahaa ee xisbiyada badan ku salaysnaa, wuxuuna billaabay xukun milatari oo keli-talis ah.

Sannadkii 1976, Siyaad Barre wuxuu si rasmi ah u dhisay Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed (XHKS), wuxuuna noqday xisbiga keliya ee dalka ka jira, taasoo meesha ka saartay suurtagalnimada tartan siyaasadeed oo furan. Dhammaan hay'adihii dowladeed waxaa laga dhigay kuwo hoos yimaada xisbigaas, waxaana la xakameeyay xorriyadda hadalka, ururrada bulshada, iyo saxaafadda.

Muddadaas, ma jirin wax doorasho ah oo dadweynuhu si xor ah ugu codeeyaan musharraxiin siyaasadeed oo kala aragti duwan. Siyaad Barre ayaa muddo dheer xilka hayay iyadoo aan la qaban wax doorasho dadweyne ah oo xor ah, hufan, lana tartamo. Xataa xilalka baarlamaanka iyo kuwa golaha wasiirrada waxaa lagu magacaabi jiray si aan loo marin hab doorasho.

Sanadihii dambe ee xukunkiisa, gaar ahaan dabayaaqadii 1980-meeyadii, kacdoonno hubeysan oo mucaarad ah ayaa ka billowday gudaha dalka, taasoo ugu dambeyn sababtay in xukunkiisii uu burburo 1991-kii, markaas oo uu dalka galay fowdo iyo dagaallo sokeeye.

## CURASHADII JAMHUURIYADA SADDEXAAD EE SOOMAALIYA:

Curashadii Jamhuuriyada saddexaad ee bartamihii sannadkii 2000, ayaa bilowday nidaamka awood-qaybsiga ee beelaha Soomaalyeed ee 4.5 oo lagu soo xulo xubnaha golaha baarlamaanka oo doorta madaxweynaha dalka. Lix doorosho madaxweyne iyo gole baarlamaan oo dhacday tan iyo 2000 ayaa saddex ka mid ah waxa ay ka dhaceen dalka dibaddiisa, halka saddexdii

doorosho ee ugu dambeeyey ay ka dhaceen dalka gudihiisa. Dhammaan doorashooyinkaas, waxaa madaxweynaha dalka soo dooranayey xubnaha baarlamaanka ee hab-beeleedka lagu soo xulay. Afartii doorasho ee ugu horreeyey, odayaasha dhaqanka ayaa soo xulayey xubnaha baarlamaanka, halka labadii doorashoo ee ugu dambeyey, xubnaha golaha baarlamaanka lagu soo xulay habka doorasho dadban ah oo ay maamul-goboleedyada awood weyn ku lahaayeen, kadib markii la wiiqay awooddii odayaasha dhaqanka. Waxa kale oo labadii doorasho ee ugu dambeeyey soo kordhay aqalka sare oo lagu soo xulo habka doorashada dadban. In kasta oo nidaamka doorashada dadban loo keenay in wax laga beddelo habkii xulashada odayaasha dhaqanka, si kor loogu qaadado hufnaanta iyo cadaaladda xulashada xubnaha baarlamaanka, hase yeeshee waxa uu noqday mid ka hooseeya xulashadii ay hogaaminayeen odayaasha dhaqanka.

Dhinca kalena, Somaliland ayaa bilowday nidaam xisbiyo iyo doorashao sannadkii 2002-dii, oo markii ugu horreysay lagu doortay golaha deegaanka (district council). Sannadkii 2003-dii, ayay Somaliland ka dhacday doorasho madaxweyne lagu dooranayo codka shacabka, waxaana ka dambeeyey saddex doorasho oo ay shacabka Somaliland ku doorteen madaxweynaha. In kasta oo muddo ka badan 20 sanno ay doorashooyin ka dhacayeen Somaliland, haddana waxa jiray saluug ku aaddan awood-qaybsiga, iyo doorashada oo xilligeedii dhaafta. Mugdi kasta oo ku jira doorashooyinka Somaliland, haddana waxa ay abuurtay tartan furan, dood-siyaasadeed iyo xisbiyo siyaasadeed oo si adag ugu beratama hogaaminta majaraha siyaasadda ee Somaliland. Sidoo kale, waxaa dhowaan laga bilaabay maamulka Puntland nidaamka xisbiyada badan iyo in lagu doortay dhammaan golayaasha deegaan ee degmooyinka dowladda Puntland. Waxyaabaha ugu muhiimsan ee laga dhaxlay doorashooyinka golaha deegaanka, waa in ay golayaashaas ka mid noqdeen dad Soomaaliyeed oo ka soo jeeda gobollada kale ee dalka, kuwaas oo aan horey ugu jirin waxqaybsiga ku salaysan hab beeleedka. Dhinaca kale, waxa la aqoonsaday nidaamka doorashada duqa degmada oo ku soo baxa heshiis dhexmara xisbiyada hela tirada aqlabiyada xubnaha golaha.

## MAXAY YIHIIN CAQABADAHA KU XEERAN DOORASHOOYINKA SOOMAALIYA?

Waxaa jira caqabado badan oo ku xeeran doorashooyinka Soomaaliya, waxaase ugu weyn qodobada soo socda:

1. **Khilaafka siyaasadeed ee u dhexeeya hogaamiyayaasha Soomaalida:** Hoggaanka siyaasadda Soomaalidu waxa uu ku fashilmay inuu la yimaado qaab doorasho la wada oggol yahay, iyadoo cid walba ay ku adkaysanayso hannaanka doorasho ee ay maslaxadeeda ka aragto. Qodobbada siyaasadeed ee laysku mari la'yahay waxaa ka mid ah: (i) Waxka-beddelka dastuurka ku-meelgaarka ah ee Soomaaliya, (ii) Khilaafka dhexyaal dowlad goboleedyada iyo Dawladda Federaalka iyo (iii) maamulka doorashada marxaladda kala-guurka ah

2. **Muran sharci:** Soomaaliya oo doorashooyinku ka bilowdeen sannadkii 1953-dii, ayna ka dhaceen doorashooyin badan, waxaa mar walba jiray muran sharci oo inta badan lagu eedeeyo madaxda xukunka haysa oo iyagu sharciga doorashada ku jaangoynaya masaalixdooda iyo hadba qaabka u sahlaya in ay xukunka sii joogaan ama kusoo laaban karaan.

3. **Musuqmaasuq:** Sida caadada noqotay horeyna u soo jirtay, waxaa doorashooyinka lagu bixiyaa lacag aad u fara badan si loo helo codadka xildhibaanada. Tusaale ahaan, Amb. Maxamed Cismaan waxa uu ku qoray buuggiisa (The Road to Zero) in markii la dilay madaxweyne Cabdirashiid Cali Sharmaarke, uu xisbiga SYL ee talada hayay uu ku heshiiyay in Madaxweyne loo sharraxo Muuse Boqor, cid kasta oo codaynaysa waxaa loo balan qaaday in la

siinayo lacag dhan 15 kun oo doolar. Tan kale, doorashada xubnaha baarlamaanka ee sannadkii 2022-kii, waxaa lagu tilmaamaa inay ahayd midii ugu xumaday ee lagu soo xulo xubnaha baarlamaanka. Madaxda dowlad goboleedyadu waxa ay soo xuleen xildhibaanno lagu soo doortay hannaanka la baxay malxiiska, iyaga oo si cad u baal maray dhammaan hab-raacyadii iyo sharciyadii doorashooyinka iyo iyaga oo aan xeerin kaalintii odayaasha dhaqanka. Taasi waxa ay keentay in xuquuqdoodii la duudsiiyo xubno badan oo beelahooda ka haystay kalsooni.

## XALALKA LAMA HURAANKA AH

Marka diirada la saaro caqabadaha ugu waaweyn ee ku saabsan doorashooyinka Soomaaliya, waxa ay qormadani soo gudbinaysaa xalal dhowr ah:

1. In la helo hannan doorasho oo heshiis lagu yahay: helitaanka hannaan doorasho oo lagu wada qanacsan yahay ayaa xal u ah qabsoomidda doorasho la mahadiyo natiijadeeda, taas oo keeni karta degenaan siyaasaadeed iyo maamul horumar ku tilaabsan kara. Si ay arrintaas u hirgasho waa in xal laga gaaro doodda ku saabsan wax ka bedelka dastuurka si loo gaaro xal waara. Xalinta khilaafka u dhexeeya dowlada goboleedyada iyo Dowladda Federaalka ayaa isna keeni kara in xal laga gaaro hannaanka doorashada ee sannadka 2026-ka.
2. Sharci doorasho oo heshiis lagu yahay: In la helo sharci doorasho oo heshiis lagu yahay, diyaarintiisana lagala tashaday bulshada qaybaheeda kala duwan, lehna damaanaad ilaalisa oo aan cidna ku xad-gubdi karin.
3. Guddi doorasho oo madax-bannaan: Maamulka doorashada waa inay gacanta ku hayaan guddi doorasho oo madax-bannaan, oo ku sifaysan hufnaan iyo karti, aqoon iyo xirfad fiicanna u leh shaqada loo xilsaaray.
4. Hannaan doorasho oo wanaagsan: Hannaan kasta oo doorasho oo la qaadanayo waa in uu noqdaa mid aan uga darin xaalka Soomaaliya sida doorashadii ku dhacday hannaanka loo bixiyey “malxiiska” ee 2022-kii. Sidoo kale, waa in hannaanka doorashadu uusan noqon mid horseeda qalalaaso siyaasadeed.

## GABAGABO

Ugu dambayntii, inta badan xasillooni darrada siyaasadeed ee ka jirta Soomaaliya, waxay ka dhalataa muran doorasho, taasoo horseedda xasaradaha iyo colaadaha sokeeye oo dalku ku burburo. Waxa aan madaxda Soomaalida ugu baaqayaa inay u damqadaan ummadda Soomaaliyeed ee dhibaatooyinka kala duwan la daalaa-dhacaysa muddada dheer, ogaadaana xilka ka saaran dalka iyo dadka, gaar ahaan dhalinyarada maydkoodu daadsan yahay saxaraha iyo xeebaha badda medetereeriyaanka.


**W/Q:** Dr. Maxamed Cali Faarax



**Xigashada Sawirka:** Reuters

# PUNTLAND MAANTA: JAHWAREER SIYAASADEED MISE FURSAD CUSUB?

Faarax Cismaan




Xigashada Sawirka: Golaha Wakiilada PL

Saddex sano ayaa ka dhimman in Puntland ay 30 sano jirsato tan iyo markii la asaasay sanadkii 1998-dii. Muddo ku filnayd in dowladnimo sal adag lagu dhiso, marka laga soo tago yoolashii lagu aas-aasay: nabad waarta, maamul loo dhan yahay, iyo doorkii Puntland ee dib-u-dhiska Soomaaliya. Hase yeeshee, waxaa dhab ah in maanta inta ka nool dadkii yagleelay Puntland ay si aad ah u saluugsan yihiin amase aan la fahansanayn lana saadaalin kara sida Puntland ay ku socoto. Faalladaan kooban waxaan ku gorfeyn doonaa xaqiiqooyin dhawr ah oo Puntland ku sugantahay wakhtigaan, kuwaas oo ah ubucda jahwareerka mustaqbal ee Puntland.

# XAQIIQOOYINKA PUNTLAND

- Kala furfurashada gobolladii lagu asaasay Puntland 1998: Puntland oo markii hore ku dhisnayd is-afgarad Gobollada Waqooyi-Bari ah, maanta waxaa soo ifbaxaysa kala fogaansho. Gobollada qaar sida Sool iyo Cayn waxa ay ka baxeen Puntland, iyada oo aysan jirin wax rasmi ah oo heshiis lagu yahay, qaar kalena waa ay guuxayaan hadda.  Ilaa hadda ma muuqato siyaasad iyo qorshe arrintaas ku aaddan, talada iyo aragtidii Puntland waxa ay ku koobantahay aragtida hal qof oo ah madaxweyne Siciid Cabdulaahi Deni.

- Ka tanaasulka doorkii qaran: Puntland waxa ay hormuud u ahayd dib-u-dhiska dowladnimada Soomaaliya, balse wixii ka dambeeyey 2012-kii waxa ay inta badan dibadjoog ka ahayd miiska siyaasadda dalka kadib khilaafaad u dhaxeeya Puntland iyo Dowladda Federaalka Soomaaliya mana laha saameyn muuqata oo qaran maanta.

- Hoos u dhac dhaqaale: Puntland oo ahaan jirtay xarun dhaqaale iyo ganacsi, maanta waxaa ka jirta shaqo la'aan baahsan, ganacsiyadii hoos ayay u dhacayaan, mashaariic horumarineed oo baaxad weynna kama jiraan. Waxaa muuqata niyad-jab, dadka intooda badan waxaa ku jira geeddi ay uga hayaamayaan Puntland.

- Adeegyada dowladeed oo liita: Ka hor asaaska Puntland iyo tobankii sano ee u horreeyey jiritaanka Puntland, adeegyada bulshada sida caafimaadka iyo waxbarashadu waxa ay ahaayeen kuwo kobcaya oo dadka rejo geliya, balse maanta xaaladdu si weyn ayay uga duwantahay. Waxaa lala daalaa dhacayaa helidda adeeg caafimaad oo asaasi ah, halka tayada waxbarashadu ay si weyn ay hoos ugu dhacday. Dhanka dowladnimada, inkasta oo xarumo dowladeed la dhisay, shaqo rasmi ah oo joogto ah kama socoto. Haddii aad booqato xarumaha dowladda, ma arkaysid shaqo micno leh oo ka socoto, Puntland waxa ay u muuqataa in ay ku socoto in ay lamid noqotay ama ka hoos martay dowlad-goboleedyada Federaalka ee ka dambeyey, marka la eego dhaqangelinta nidaamka dowladeed, ku dhaqanka sharciga, hufnaanta iyo adeeg bixinta.

Xaqiiqooyinka aan kor kusoo xusnay waxa ay si cad u muujinayaan in Puntland wajahayso caqabado ballaaran oo ku saabsan midnimada gobolladii lagu asaasay, doorkii ay ku lahayd siyaasadda dalka, hoos u dhaca dhaqaale, burburka adeegyada bulshada, iyo jahawareer ku yimid aragtidii dowladeed ee Puntland. Haddaba, su'aasha muhiimka ah ayaa ah: maxaa sal u ah dhammaan arrimahan? Jawaabtu waxa ay tahay hal eray: hoggaan-xumo. Ma jirto sabab ka weyn fashilka hoggaanka siyaasadeed ee Puntland oo horseeday kala daadsanaan, niyad-jab bulsho, iyo in ay mugdi gasho himiladii dowladnimo.

Tusaale ahaan, gobollada Sool iyo Cayn waxa ay muddo dheer ahaayeen kuwo ka maqan gacanta Puntland, balse sanadkii 2023-kii ayay ku soo noqdeen kadib kacdoon bulsho. Si kastaba, ma jirin wax qorshe ah oo ay Puntland la timid oo ku aaddan taageerista maamul ka dhisma deegaannadaas ama xoojinta midnimada gobolladaas ee Puntland. Arrintaas waxa ay si toos ah u muujisay in hoggaanka Puntland uusan lahayn aragti iyo qorshe siyaasadeed oo lagu wajahayo duruufaha cusub balse siyaasada goboladaas ku aadan ay noqotay mid un ku salaysan dano gaar ah oo madaxweynuhu leeyahay, taas oo ugu dambayn sababtay in la dhiso dowlad-goboleedka SSC-Khaatumo iyada oo aysan Puntland wax dowr ah ku lahayn hannaankaas, lana diyaarin sidii loo kala guran lahaa.

Dhanka kale, tan iyo 2022-kii, Puntland waxaa ka curtay tabasho siyaasadeed oo salka ku haysa boobka doorashooyinka iyo awoodaha dowladnimo, iyada oo hoggaanka talada haya uu keligiis isku koobay go'aannadii siyaasadeed, dhaqaalihii, iyo matalaaddii dadweynaha. Arrintan ayaa si toos ah u dhaawacday kalsoonidii shacabka iyo sharaftii Puntland ku dhex lahayd bulshada Soomaaliyeed. Puntland maanta kama muuqato miiska siyaasadda dalka saamayn weynna kuma laha, taas oo muujinaysa in ay lumisay doorkii siyaasadeed ee ay horay u lahayd.

Si la mid ah, Puntland waxa ay lumisay mashaariicdii horumarineed iyo kaalmadii caalamiga ahayd oo muhiim u ahayd bulshada iyo dhaqaalaha deegaanka, sababo la xiriira khilaafka siyaasadeed ee kala dhexeeya Dowladda Federaalka, mashaariic mug leh oo deegaanka ka socotana ma jirto.  Guud ahaan isu-socodkii dhaqaale iyo fursadihii shaqadana waa ay yaraadeen. Dhammaan tusaalooyinkaan kooban waxa ay muujinayaan in ubucda dhibaatada dowladeed ee Puntland ka jirta ay tahay fashilka hoggaanka!.

Marka la eego xaaladda siyaasadeed ee Puntland, waxaa si cad u muuqata in aan xal kasoo muuqan hoggaanka talada haya ee isku koobay go'aankii iyo aragtidii dowladnimo, iyada oo aysan jirin wax istiraatijiyad ah oo muuqata oo uu ku wajahayo xaaladaha cakiran ee ka jira deegaanka. Isla mar ahaantaasna, ma jiraan xisbiyo siyaasadeed oo leh aragti iyo miisaaan, sidoo kale baarlamaanka hadda jira loogama fadhiyo in uu xilkasnimo ku wajahayo xaalka Puntland hadda marayso. Sidaas darteed, rajada kaliya ee Puntland dib la isugu qaabayn karo waxa ay ku jirtaa baraarug bulsho iyo dhaqdhaqaaq dadweyne oo dhab ah.

Baraaruggaan bulshada waa inuu noqdaa mid ay horkacayaan indheergaradka reer Puntland, aqoonyahannada, dhaqanka, culimada, ganacsatada, haweenka iyo dhalinyarada—kuwaas oo si madax-bannaan ugu istaaga sidii loo heli lahaa jiho cusub. Dhaqdhaqaaqyadaas bulsho waa inay noqdaan kuwo ka fog dano gaar ah, kana madax-bannaan faragelin dibadeed, balse fura saaxad cusub oo wadatashi ah, kaas oo sal u noqon kara dib-u-heshiisiin, dib-u-eegis siyaasadeed, iyo dib-u-curasho dowladnimo oo cusub. Himillada ugu dambeysa waa in laga arrinsado mustaqbalka Puntland, lana sameeyo shirweyne bulsho oo iftiimin kara jiho cusub.

Waxaa durba muuqata in dhabbadaas la galay. Shirweynaha Horumarinta Gobolka Mudug ee lagu dhawaaqay bishaan Luulyo 2025 waa astaan cad oo muujinaysa in dareenkii bulsho uu dhaqaaqayo. Shirkaan waxa uu tusaale u noqon karaa ifafaale cusub iyo bar bilowga isbeddel laga dhaxlo. Sidaa darteed, waa in dadaalladaas laga hirgeliyaa dhammaan gobollada Puntland, iyada oo la abaabulayo shirar heer degmo ilaa heer gobol, kuwaas oo xoogga lagu saaro xaaladda horumarineed, nabadgelyada, iyo dowladnimada deegaanka. Puntland waxa ay u baahan tahay jiho cusub—mid ay dadkeedu abuuraan, kana dhalata garasho, wadahadal, iyo damiir ummadeed.




**Xigashada Sawirka:** Golaha Wakiilada PL



**Xigashada Sawirka:** Kaab TV

# SOOMAALIYA IYO HIMILADA CAAFIMAADKA LOO SIMAN YAHAY:

## Waa Riyo Hore oo Rajadeedii soo Muuqatay

Dr. Liban Cigaal



Xigashada Sawirka: WHO EMRO

**"Bulsho lama oran karo waa bulsho horumarsan haddii qof buka laga horjoogo daryeel caafimaad sababo la xiriira inuusan haysan awood dhaqaale."**

**— Aneurin Bevan, wasiirkii caafimaadka ee UK, 1948**

# HORDHAC: RIYADII & RAJADEEDII UHC

Qof kasta oo si dhab ah uga damqada bulshada Soomaaliyeed, wuxuu dareemi karaa culayska ka dhasha marka la arko dad bukaan ah oo la nool xanuun,iyagoo aan awoodin qarashkii ay ku bixin lahaayeen daawada ama daryeel xumo caafimaad darteed ay u balaan balsanyihiin. Waa xanuun gudaha ah, oo aan la dareemi karin ilaa aad aragto ilmaha qandhaysan oo hooyadii dhabarkeeda ka dul ooyaya ee aan daawo waxay siistaan heli karin, hooyada uurka leh ee aan waligeed la eegin caafimaadka ubadka ay sido, ama odayga waayeelka ah ee buka ee tabaalaysan ee sababo la xiriirta lacag la'aan la aadi waayay xarumaha caafimaadka.

Riyada ku saabsan helitaanka nidaam caafimaad oo bilaash ah, dadkuna u simanyihiin, waxa ay salka ku haysaa fikir dhowr iyo toban sano ka hor igu bilowday. Fikirkan ayaa markii ugu horreysay sannadkii 2013-kii aan ku soo bandhigay qoraal cilmiyeed kooban oo diiradda aan ku saarayay suurtagalnimada hirgelinta Caymiska Caafimaadka Guud (UHC) ee dalalka dakhligoodu hooseeyo, gaar ahaan Soomaaliya, iyadoo aan falanqeeyay in la yagleeli karo nidaam daryeel caafimaad oo dadku u simanyihiin.

Nidaam daryeel caafimaad oo dadku u simanyihiin waa la gaari karaa hadii lala yimaado rabitaan iyo hiigsi dhab ah. Daryeelka caafimaad waa xuquuq aadanaha oo dhan leeyihiin, taasoo lagu caddeeyay heshiisyo caalami ah sida Baaqii Alma-Ata iyo Yoolalka Horumarka Waara ee (SDGs) ee Qaramada Midoobay soo saartay. Marka laga eego aragtidan, hirgelinta nidaam caafimaad oo loo simanyahay Soomaaliya waxa ay hore u ahayd riyo fog, balse maanta waxaa muuqda rajo dhab ah, gaar ahaan iyadoo tusaalayaal dalalka dariska ah ay suurtageliyeen dhankooda.

Mar haddii dhibaatooyinka dalkeena ka jiray mudaba la tilmaamayay sida qaybsanaanta iyo dhibaha faraha badan ee jira, waxaa lagama maarmaan ah in la qeexo xalka iyo muddada la doonayo in lagu gaaro gaar ahaan arintan caafimaadka loo simanyahay. Sida ay Soomaalidu tiraahdo: "Doqonku wuxuu yidhaahdaa maxaa i helay, caaqilkuna wuxuu yiraahdaa maxaan sameeyaa."

Diinta Islaamka waxay si cad inagu faraysaa ilaalinta nafta, naxariista, iyo is-gargaaridda. Ilaalinta caafimaadka qofka waa waajib diini ah, waana tiir ka mid ah anshaxa bani'aadamka iyo mas'uuliyadda waddaniga. Tani waxay la jaanqaadaysaa mabaadi'da Baaqii Alma-Ata ee 1978-dii, halkaas oo Soomaaliya ay kamid ahayd dalalkii saxiixay in daryeelka caafimaadka aasaasiga ahi uu yahay xuquuq aadanaha u simanyihiin ay tahayna inay helaan.

Baaqa Alma-Ata wuxuu dhidib u aasay fikradda ah in caafimaadka aasaasiga ah lagu gaarsiiyo qof walba meesha uu ku noolyahay, iyada oo aan loo eegin awooddiisa dhaqaale. Qodobkan ayaa si rasmi ah uga mid noqday Yoolalka Horumarka Waara (SDGs) ee 2030 la hiigsanayo.

Cilmi-nafsiga iyo cilmiga neerfaha (Neuroscience) ayaa caddeeyay in fakarka togan uu xoojiyo awoodda qofka ee xal raadinta. Maskaxda aadanaha marka la geliyo yididiilo, waxa ay sii deyneysaa maadooyin dhiirrigeliya firfircooni iyo go'aan qaadasho (dopamine, serotonin, oxytocin). Sidaa daraadeed, rajada iyo qorshaha cad waxay ka mid yihiin talaabooyinka ugu horreeya ee isbeddelka bulshada lagu gaari karo.

# SHUMACII UGU HOREEYAY EE GEESKA AFRIKA KA BAXAY EE UHC

Wasaaradda Caafimaadka Kenya ayaa dhawaan ku dhawaaqday in dhammaan xarumaha caafimaadka dadweynaha ee heerarka 2–4 laga hirgelinayo adeegyo caafimaad oo bilaash

ah. Tallaabadan ayaa si buuxda u daboolaysa adeegyada la-talin caafimaad, baaritaanno iyo daaweyn aasaasi ah, raajo, ultrasound, tallaal, daryeelka hooyada iyo dhallaanka, cudurrada maskaxda, iyo xanuunnada daba-dheeraada.

Kenya waxay 2023–2024 samaysay isbeddel sharciyeed ballaaran, iyadoo la meel mariyay Universal Health Coverage Act, taasoo dammaanad qaadaya in adeegyada caafimaadka heerarka hoose (PHC) si buuxda oo bilaash ah loogu fidiyo dhammaan muwaadiniinta dalka. Tani waxay ka dhigtay Kenya dalkii ugu horreeyay ee si buuxda uga hirgeliyay UHC gudaha Geeska Afrika, iyadoo dalal kale sida Itoobiya ay weli ku jiraan heerar tijaabo iyo dadaal deegaan.

Kenya waxay caddeysay in ballan-qaadkii UHC la hirgelin karo, haddii ay jirto rabitaan siyaasadeed iyo abaabul bulsho.

## SOOMAALIYA & UHC

Waxaa jira dad badan oo niyad-jabsan, oo u arka in hirgelinta nidaam caafimaad oo bilaash ah Soomaaliya aysan suuragal ahayn sababo la xiriira xaaladda amniga, dhaqaalaha ama siyaasadda. Laakiin xaqiiqadu waxay tahay in waddamo ka liita Soomaaliya dhinacyo badan sida burbur, saboolnimo ama xasilooni darro ay haddana awoodeen inay nidaamkan hirgeliyaan. Dalka Soomaaliya ma aha mid dhamaantiis ah hal xaalad; waxaa jira deegaano badan oo amni ah, dadkuna ay abaabulan yihiin, taasoo u sahli karta in laga bilaabo hirgelinta nidaamyo tijaabo ah oo caymis bulsho. Inta nolol jirto, rajo way jirtaa. Soomaaliya waxay leedahay dad karti leh, hal-abuur leh, isla markaana leh damiir bulsho oo wax isweydiinaya. Waxaa la joogaa waqtigii laga dhaqaaqi lahaa cabasho loona gudbi lahaa ficil.

Soomaaliya waxay leedahay duruufo adag: dowlad daciif ah, amni xumo, dhaqaale xumo, iyo adeegyo caafimaad oo aad u tiro yar. Laakiin sidoo kale waxay leedahay fursado qani ah: bulsho is-caawisa, qurbajoog aqoon leh, tiknoolajiyad kobcaysa, iyo maamulo deegaan oo dadaalaya.

Waxaa suurtaggal ah in la dhiso nidaam bulshadu leedahay, iyadoo qof walba bixiyo tusaale ahaan $5 sanadkii. Lacagtaas waxay dhisi kartaa sanduuq caafimaad oo damaanad qaada adeegyo aasaasi ah, iyadoo la adeegsanayo nidaam hufan iyo xisaab furan.

Soomaaliya horey ayay ugu jirtay saxiixayaasha Baaqa Alma-Ata. Maanta, waxaa laga maarmaan ah in ay ka mid noqoto dalalka fuliyay ballanqaadkaas. Tani waa fursad ay Soomaaliya ku caddeyn karto in aysan ku tiirsanayn deeq, balse ay haysato awood isbeddel gudaha ka dhaca.

## RWANDA: & ISBEDDELKII LAGU DHIIRRADAY

Rwanda ayaa tusaale u ah dal kasoo kabtay burbur, balse si qorshaysan ugu jihaystay horumar caafimaad oo ballaaran. Tan iyo horraantii 2000-meeyadii, dowladda Rwanda waxay bilowday nidaam caymis caafimaad dadweyne (Mutuelles de Santé), kaas oo lagu bilaabay qaab bulsho-isku tashatay ah. Muwaadin kastaa wuxuu sanadkii bixin jiray qiyaastii $3, taasoo suuraggelisay in adeegyo caafimaad aasaasi ah loo fidiyo in ka badan 90% bulshada.

Rwanda waxa ay maanta maamushaa in ka badan 58,000 oo shaqaale caafimaad ah oo kala duwan (dhakhaatiir, kalkaaliyayaal, umulisooyin, iyo shaqaalaha caafimaadka bulshada). Waxay leedahay in ka badan 500 xarumood oo caafimaad, oo ay ku jiraan xarumo yaryar, xarumo dhexe, iyo isbitaallo. Dhaqaale ahaan, barnaamijkan wuxuu sannad walba ka aruuriyo $40–50 milyan USD oo kasoo baxa bulshada, waxaana lagu daraa taageero dowladda iyo deeq caalami ah.

Rwanda waxay ka faa'iiday horumar la taaban karo. Helitaanka adeeg caafimaad oo dadka wada gaarey, waxaana si weyn hoos ugu dhacay heerka dhimashada hooyada iyo dhallaanka. Sanadkii ay bilaabeen barnaamijka UHC, dhimashada hooyada waxay ahayd in ka badan 1,000 hooyo halkii 100,000 dhalmo ah; toban sano gudahood waxay hoos ugu dhacday ilaa ku dhowaad 290. Sidoo kale, dhimashada dhallaanka ayaa laga dhigay kala bar wixii ay ahayd. Tani waxay muujisay in halgan joogto ah iyo nidaam caymis dadweyne uu horseedi karo natiijooyin caafimaad oo muuqda.

# SOOMAALIYA UHC : WAA KA SUURTAGAL

Soomaaliya oo leh dad gaaraya 20 milyan, haddii qof walba bixiyo $5 sanadkii, waxa la heli karaa $100 milyan USD sanadkiiba. Lacagtani waxay suurtagelin kartaa:

- Dhisidda ama taageeridda 500–700 xarumo caafimaad oo heer asaasi ah.
- Hirgelinta 50–100 isbitaal heer gobol ah.
- Mushaharka ilaa 10,000–15,000 oo shaqaale caafimaad ah (dhakhaatiir, kalkaaliyayaal, umulisooyin, iyo shaqaale kale ah).
- Tababaro joogto ah, wacyigelin bulsho, iyo adeegyo caafimaad oo ka hortag iyo kor u qaadid caafimaadka bulshaba leh.

Arinkani oo lagu dhiirado waxay muujinaysaa in nidaam isku-filnaansho ah oo heer qaran ah lagu gaari karo haddii la helo rabitaan, abaabul bulsho, iyo daacadnimo hufan. Soomaaliya oo dhan ayaa yeelan karta nidaam caymis caafimaad dadweyne oo mid qudha, iyadoo aan ku tiirsanayn deeqo dibadeed balse ku dhisan karti iyo wadajir bulsho in nidaam isku-filnaansho ah lagu gaari karo haddii la helo rabitaan, abaabul, iyo daacadnimo hufan.

Isbeddelkan waxaa sal u ahaa mabda'a ah in caafimaadku yahay xuquuq bulsho oo aan cidna laga reebi karin. Tallaabadaas ayaa horseeday hoos u dhac weyn oo lagu arkay dhimashada hooyada iyo dhallaanka, sare u kaca wacyiga caafimaad, iyo koboc ku yimid wax-soosaarka bulshada. Rwanda waxay caddeysay in waddan kasta, xitaa haddii uu ka soo kabanayo colaado, uu gaari karo UHC haddii uu leeyahay rabitaan siyaasadeed, hufnaan nidaam, iyo ka qaybgal bulsho.

# PUNTLAND & UHC GOGOL-DHIG U NOQATA

Puntland waxa ay leedahay duruufo iyo xaalado u gaar ah oo ka dhigaya deegaan ku habboon in laga hirgeliyo Universal Health Coverage (UHC). Marka la eego xasilloonida siyaasadeed ee heer gobol, awoodda maamulka, iyo dadaallada socda ee lagu horumarinayo adeegyada guud, Puntland waxa ay si dhab ah ugu qalantaa in loo adeegsado bilowga mashruuca isku tashiga (pilot) ah ee hirgalinta daryeel caafimaad oo loo simanyahay ( UHC). Tani waxa ay fursad weyn u noqanaysaa in laga helo casharro muhiim ah oo lagu horumarin karo hirgelinta UHC guud ahaan dalka. Sidaas darteed, waa suurtaggal in laga bilaabo Puntland, taas oo noqon karta tallaabo istiraatiiji ah oo u gogol xaareysa hirgelinta ballaaran ee adeegyada daryeel caafimaad oo loo siman yahay Soomaaliya oo dhan, waa haddii la helo rabitaan, abaabul bulsho, iyo daacadnimo hufan. Soomaaliya oo dhan ayaa yeelan karta nidaam caymis caafimaad dadweyne oo dhab ah. Puntland waxay noqon kartaa halka ugu horreysa ee Soomaaliya oo hirgelisa nidaamka caymis caafimaad dadweyne taasoo noqon karta tijaabo waddani ah oo guud ahaan dalku uga faa'iidaysan karo.

# GUNAANAD

Tusaalayaal guuleystay sida Rwanda, Ghana, iyo hadda Kenya, waxay muujinayaan in UHC ay tahay rajo la gaari karo. Ma aha riyo mala-awaal ah ee waa qorshe suurtaggal ah. Waa muhiim in Soomaalidu u aragto caafimaadka bilaashka ah mid dhab ah oo aan sugin gargaar dibadeed iyo arima kale.

Fikarka togan, go'aano adag, iyo abaabul bulsho ayaa noqon kara saddexda tiir ee lagu gaaro caafimaad loo simanyahay. Diinta, caqliga, iyo cilmiga casriga ah dhammaantood waxay isku waafaqeen: "Dhibtu way jirtaa, balse xal baa jira, haddii la garto, lana guto waa la gaaraa wixii la raadiyo."

Taariikhdu ha xusto in aynu aragnay iftiinka, inaguna dooranay in aynu ku soconno jihadiisa.

**W/Q:** DR Liban Cigaal, BMS, MBBS, MPH & Global Health Diplomacy

Email: raydab@hotmail.co.uk



Xigashada Sawirka: Pacific Legal Foundation

# XAQQA ARAGTI DHIIBASHADA –

## حرية الرأي والفكر

Saki Rabiica

Xorriyadda aragtida iyo fikirku waa tiir ka mid ah tiirarka ugu muhiimsan ee lagu dhiso bulshooyin xasiloon, hufan, oo is-ixtiraama. Soomaaliya oo soo martay xukunno kala duwan, burbur iyo qaran jab, waxa maanta la jooga xilli loo baahanyahay in si dhab ah loo fahmo looguna istaago ilaalinta xaqa muwaadinka uu u leeyahay inuu cabbiro fikirkiisa. Qormadan waxa ay diiradda saareysaa muhiimadda xorriyadda aragtida, xadgudubyada ka dhanka ah, iyo sida diinta, dastuurka, iyo waayo-aragnimada Soomaaliyeedba u caddaynayaan qiimaha ay leedahay.

Xorriyadda fikirka iyo dhiibashada aragtidu waa mid ka mid ah xuquuqda aasaasiga ah ee ay bini'aadamku leeyihiin, taas oo saldhig u ah jiritaanka bulsho xor ah oo caddaalad ku dhisan. Waa xaq ilaahay siiyay qofka, si uu si xor ah oo Alle mooyee cidkale uusan ka cabsanayn ku cabiro aragtidiisa, ugana qayb qaato arrimaha bulshada, isaga oo aan cabsi ka qabin in lagu ciqaabo fikirkiisa. Xaqani waxa uu leeyahay sal sharciyeed, mid diimeed, iyo mid akhlaaqeed oo ay ka wada siman yihiin dhammaan bulshooyinka horumarsan.

## 1. DIB-U-MILICSI IYO TAARIIKH KOOBAN

Markii laga baxay gumeystihii, Soomaaliya waxa ay gashay marxalad siyaasadeed oo lagu tixgelinayay xorriyadda hadalka iyo doodda. Hase yeeshee, xukuumaddii militariga ee kacaanku waxa ay gabi ahaanba meesha ka saartay xorriyaddaas. Dastuurkii dalka waa lalaalay, hay'adihii caddaaladda iyo sharciyadda waxa ay u gacan galeen nidaam kelitalisnimo ku dhisan. Waxaa bilaabmay cabburin joogto ah oo loo geysto cid kasta oo ka aragti duwan hoggaanka talada haya. Tani waxa ay sababtay kacdoon dadweyne oo horseeday in la rido nidaamkii kaligiitaliska ku dhisnaa.

Markii dambe dalku waxa uu galay dagaal sokeeye, kaas oo horseeday burbur baaxad leh. Intaa ka dib, dadka Soomaaliyeed waxa ay heleen fursad ay ku cabbiraan aragtidooda, balse xorriyaddaas ayaa maanta mar kale wajahaysa khatar — waxaana isa soo taraya tallaabooyinka lagu cabburinayo xoriyadda fikirka iyo hadalka.

## 2. XAALADDA MAANTA: FIKIR LA CABSIGA IYO CABBURINTA

Waxaa soo noqnoqday falal loogu xadgudbayo xorriyadda aragtida, kuwaas oo ka dhacaya heer maamul-goboleed iyo heer dowlad dhexeba. Waxaa la joojiyaa shirar iyo isu-soo-baxyo nabadeed, waxaa la cabburiyaa saxaafadda, waxaana la cadaadiyaa siyaasiyiinta ama shacabka aragtidooda dhiibta.

Sanadihii u dambeeyay, waxaa isa soo tarayay dhacdooyin lagu muquuninayo xorriyadda aragtida. Tusaale ahaan, dhallinyaro ka cabanaya adeeg xumo dowladeed ayaa waxaa lagula kacay qeybtood xarig, iyadoo lagu eedeeyay khalkhal galin amni. Sidoo kale, bannaanbaxyo ay abaabuleen dhallinyaro u ol'oleynayay oo dalbanayay waxqabad dowladeed ayaa la is hortaagay. Tani waxa ay abuuraysaa cabsi guud, taas oo keeni karta in dadku ka aamuso khaladaadka jira, arrintaas oo halis galinaysa xoriyada hadalka iyo mustaqbalka dimuqraadiyadda dalka.

Waxaa intaas dheer, in mararka qaar la arko madax ku takrifalaya awoodda, iyaga oo beddelaya dastuurka ama shuruucda lagu heshiiyay, si ay ugu fushadaan dano gaar ah, iyada oo aan la helin heshiis bulsho. Tani waxa ay halis gelinaysaa jiritaanka dowladnimada iyo kalsoonida shacabka.

## 3. DASTUURKA PUNTLAND IYO KAN FEDERAALKA SOOMAALIYEED

Dastuurka Puntland – Qodobka 14aad: Xorriyadda Fikirka

"1. Qof kasta xor buu u yahay fikraddiisa waana soo bandhigi karaa. Faafreeb horudhac ahi

waa reebban yahay. 2. Qofku waxa uu fikraddiisa ku cabbiri karaa qaab hadal, saxaafadeed, qoraal, muuqaal, suugaan iyo habab kale oo sharciga iyo anshaxa waafaqsan."

Dastuurka Puntland – Qodobka 24aad: Bannaanbaxyada

"Muwaadin kasta oo Puntlandar ah waxa uu xor u yahay in uu abaabulo, ka qaybqaato bannaanbaxyo ku salaysan hab nabadgelyo, si xeerka waafaqsan."

Dastuurka Federaalka Kumeel Gaarka ah – Qodobka 18aad:

"Qof kastaa waxa uu xaq u leeyahay in uu yeesho, soo bandhigo ra'yigiisa iyo in uu doono, inuu helo oo gudbiyo ra'yigiisa, xog ama afkaar si kastaba."

Qodobadaas waxa ay si cad u xusayaan in qof walba xaq u leeyahay in uu fikirkiisa cabbiro, isla markaana aysan jirin cid xaq u leh in ay ka hor istaagto xuquuqdaas sharciyeed.

# 4. QUR'AANKA IYO XADIISKA

Qur'aanka Kariimka ah (Suurat Ash-Shuuraa – 42:38):

"...Oo arrintoodu tahay talo dhexdooda ah..." وَأَمْرُهُمْ شُورَىٰ بَيْنَهُمْ

Aayaddani waxa ay muujinaysaa in la-tashiga, doodda iyo kala aragti-duwanaantu ay ka mid yihiin astaamaha bulshooyinka wanaagsan.

Suurat Al-Baqara – 256:

"ma jirto wax kugu khasbaya diinta... لا إِكْرَاهَ فِي الدِّينِ"

Tani waa tiir kale oo Qur'aanka ka mid ah oo diidaya in qof lagu khasbo fikir ama diin uusan aaminsanayn.

Xadiis – Muslim:

Rasuulka (NNKH) waxa uu yiri: "Qofkii idinka mid ah ee arka xumaan, ha ku bedelo gacantiisa; hadduusan awoodeyn, afkiisa; hadduusan awoodeyn, qalbigiisa... من رأى منكم منكرًا فليغيِّرْه بيدِه فإن لم يستطعْ فبلسانِه. فإن لم يستطعْ فبقلبِه""

Xadiiskaan waxa uu iftiiminayaa muhiimadda ay leedahay in qofku codkiisa adeegsado si uu u muujiyo aragtidiisa marka uu la kulmo dulmi ama khalad.

# 5. CAWAAQIBKA CABBURINTA FIKRADDA

Marka xoriyadda fikirka laga mamnuuco bulshada:

- Waxaa meesha ka baxa isla xisaabtanka.
- Waxa ay abuurtaa kelitalisnimo iyo kalsooni-darro siyaasadeed.
- Dadku waxa ay ka gaabsadaan in ay wax sheegaan, taas oo burburisa hal-abuurka iyo is-beddelka.
- Waxaa dhalan kara kacdoon bulsho oo aan la xakameyn karin.

Haddii aanan si dhab ah loo ilaalin xoriyadda hadalka iyo fikirka, dalku waxa uu mar kale geli karaa xaalado la mid ah kuwii hore ee horseeday burburka.

Xorriyadda fikirka iyo aragtidu waa astaan muwaadinimo, waxayna sal u tahay dowladnimo caddaalad ku dhisan. Xaqani ma aha mid siyaasi bixiyo ama xukuumad xaddidi karto si waafaqsan rabitaankeeda, balse waa hanti qaran iyo wax Alle siiyay qof kasta. Haddii aan rabno bulsho horumarsan, waa in la ilaaliyo xorriyaddan, lana abuuro jawi ay dadku si xor ah ugu cabbiri karaan aragtidooda iyaga oo aan ka baqayn cawaaqib xumo.

Isbeddelka laga sugayo Soomaaliya maanta ma aha in qof qof kale lagu beddelo, balse waa in la beddelo nidaamka iyo hab-dhaqanka siyaasiga ah ee khaldan. Isbeddelka dhabta ah ee Soomaaliya ay u baahantahay waa mid ku salaysan feker furan, la xisaabtan iyo ka qaybgalka shacabka ee siyaasadda. Bulshadu waa in ay ka dhiidhidaa hab-dhaqanka siyaasiga ah ee ku dhisan caddaalad darrada, kuna dhaqaaqdaa abaabul siyaasadeed. Ilaalinta xorriyadda aragtidu waa bilowga waddadaas iyo u hayaamidda siyaasad ku dhisan caddaalad, sinnaan, iyo xaqsoor.

Xorriyadda aragtida ma aha deeq siyaasi bixiyo, waa xaq Alle bixiyay.

**W/Q:** Saki Rabiica

# MUSTAQBALKA TIKNOOLOOJIYADDA & WAXBARASHADA

Xigashada Sawirka: GIZ



Iyadoo aan ku jirno qarnigan 21-aad, waxaa si weyn u soo muuqanaya isku xirnaanta Tiknooloojiyadda iyo waxbarashada. Waxaana tusaale ah, markii aan ka baxay dugsiga sare, qeybo badan oo waxbarashada ah xiriirka xooggan lama lahayn Tiknooloojiyadda. Waxa aan xusuustaa in manhajka waxbarashadeenna aanu ku jirin wax ku saabsan tiknoloojiyad, taasoo si kooban noogu iftiiminaysa halkii ay wax marayeen. Fasalladayadu waxa ay ahayeen kuwo ayba ku cusubtahay sabuuradda cad iyo qalinka khadka leh, waxaana suureysanaynay in aannu tillaabo horey u qaadnay. 20 sano kadib dib haddii aan maanta barbardhigo, fasallada ay wax ku bartaan carruurteyda, waa isla kuwii aan anigu wax kusoo bartay, waxaana ku soo kordhay un maaddo "computer" ku saabsan oo iskuulku uu ardeyda siinayo maadadii oo aanan lahayn "itus oo itaabsii."

Haddaba, qormadaan waxa aan rabaa in aan ku iftiimiyo in gabbalkii waxbarashadii noocaa ahayd uu dhacay, loona baahanyahay in aan la jaanqaadno casriga aannu joogno iyo sida aqoontu ugu tiirsantahay Tiknooloojiyadda.

Dalalka horumaray ayaa horraantiiba fahmay in waxbarashadu aanu ahayn "qofwalba ku jin" balse ay tahay in loo eego ardeyga awooddiisa maskexeed iyo hibooyinkiisa. Taas oo fursad weyn siinaysa in uu soo boxo arday si xiiso leh wax usoo bartay, bulshadiisana uga faa'iideya hibooyinkiisa. Soomaaliya oo ah dal burburay, fursadda caynkan ah ma aysan helin, waxaana loo aaneynayaa sida uu qabo Dr. Cabdiqani Dalla'aan in 14% oo keli ah ay imtixaanka iskuulka sare u fariistaan ardaydii kasoo billaabay dugsiga hoose, ayna kamid tahay sababaha in ardaygu aanu helin fursadda waxbarasho oo ku filan, halkii macallinna uu celcelis ahaan 40 arday wax baro, taas oo muujinaysa hooseynta tayada aqooneed ee ardey walba uu heli karo.

Saamaynta ugu weyn ee horumar la'aanta tiknoolajiyada ee waxbarashada waxaa la arkay xilligii caabuqa Covid-19 oo la xiray inta badan xarumaha waxbarashada hoose ee kuyaala dalka, taasoo keentay sida dunida kale in loo wareejiyay fasallo fogaan arag ah (virtual classes), si loo hubiyo in ardaydu ay sii wataan waxbarashadooda xitaa iyadoo ay jiraan xayiraado iyo xaalado caafimaad oo adag, balse taasi waxay ahayd mid adag marka la fiirsho xaalada Soomaaliya, oo aan lahayn kaabayaal dijitaal ah oo buuxa.

Warbixinta ugu weyn ee dunida ee hay'adda UNICEF oo ugu dambeysay oo ay soo saartay oo ciwaankeedu yahay "Carruurnimada Dunida Dijitaalka ah" ayaa muujinaysa in 1.3 bilyan oo caruur ah dunida aysan haysan internet-caruurtaas oo intooda badan kunool qaaradaha Africa iyo Aasiya. Waxaa warbixinta lagu ogaaday in caruurta oo aan haysan adeega internet-ka ay keenayso in ay hooseyso xirfadooda dijitaalka, taasoo keenaysa in ay saamayn weyn oo taban ku yeelato waxbrashadooda iyo shaqaalyasiinta mustaqbalka.

Maadaama xaalkeennu sidaa u adagyahay, qormadan waxa aan doonayaa in aan soo jeediyo sida waxbarashadeenna aan u tayeyn lahayn, innaga oo ka faa'iideysanayna tiknoolajiyada casriga ah.

## Waxbarasho qofka lagu jaangooyey iyada oo la'isticmaalayo Garaadka Macmalka ah (Artificial Intelligence)

Garaadka Macmalka ah (AI) waa hoggaamiyaha waxbarashada maanta. Iyada oo ardeyga laga qaadayo xog-ururin ku saabsan heerka fahankiisa, aqoontiisa, da'diisa iyo waxyaabaha uu xiiseeyo, ayaa loo abuuri karaa waxbarasho ku aaddan awooddihiisa kala duwan iyo hibooyinkiisa. Dhanka kale waxaa loo diyaarinayaa hannaan la jaanqaadaya fursadda qofku heli karo iyo heerka fahankiisa inta uu le'egyahay. Waxaana horey u sameeyey madalaha Khan Acadmey, Duolingo oo afafka lagu barto.

## Waxbarashada xaqiiqada macmalka ah (Virtual & Augmented Reality VR/AR)

Waxbarashada badankeed, waxa aannu ku qaadan jirnay qaab xog ah, balse marka la isticmaalayo nidaamkaan, waxa ay noqoneysaa waxbarashadii mid ka xiise badan marka kale. Ardeygu waxa uu helayaa fahan xeel dheer oo lamid noqonayo sida qof indhihiisa kusoo arkay waxa la barayo, sida casharrada la xiriira taariikhda iwm. Waxa ayna ku abuureysaa ardeyga xusuus xeel dheer oo ballaarinaysa fahanka uu ka haysto waxa uu baranayo.

## Fasalka caalamiga ah!

Waxaa jira muuqaal ku jira barta YouTube oo

uu Dr. Roy Casagranda kaga hadlayo Saxaabigii Halyeyga ahaa Khaalid Binu Waliid iyo habkii uu dagaallada ugu guuleysan jiray. Muqaalkaas faallo aan ka bixiyey 3 sano ka hor ayaan kaga hadlay in fasalka Dr. Casagranda ay fadhiyeen arday ka yar 20 qof, balse markaa ay daawadeen nus-milyan, haatanna muuqaalkii ay daawadeen in ka badan 3 milyan, faalladeydiina ay like saareen illaa 4.6K oo qof. Waxbarashada maantay waxa ay noqotay mid caalami ah, waana sababta keentay jaamacadaha dunida ugu waaweyn in duruustooda ku soo bandhigaan baraha ay kamid tahay YouTube.

## Ciyaarsiinta waxbarashada

Waxbarashada oo loo dhigo qaab ciyaar ah, waa hannaan kamid ah kuwa sida weyn u bedeley habkii wax loo baran jiray. Iyada oo waxbarashadii la dhexgelinayo dhibco lagu tartamo, billado lagu guuleysto, dhibco-tirsi lagu baratamo, waxa ay waxbarashadii noqotay madadaalo illowsiisa ardayga in uu waxbarasho ku jiray. Dalalka arrintaas hirgeliyey waxaa kamid ah Norway, waxaana eegi kartaa platform-ka Kahoot.

## Dhallan-roganka kaalinta macallinka

Maadaama kaalintii macallinku ay sii shiiqinayso Tiknooloojiyadda, horeyna macallinku u ahaa halka keliya ee aqoonta haya, hadda macallinka kaalintiisii waxa ay isugu biyo shubatay in uu noqdo hage. Xogta ku dhisan ee laga ururinayo ardayga iyo hadba heerka uu marayo, macallinku waxa uu garan karaa ardayga culeyska ka cabanaya, waxa uuna u diyaarin karaa hannaan uu la jaanqaadi karo. Horumarka xirfadeed waxa uu u guurayaa dhanka , tababarrada online-ka ah iyo iskaashiyada kala duwan waxa ay kor u qaadayaan caawimaadda macallinka.

## Waxbarashada joogtada ah ee koorsooyinka kooban

Dhanka kale, dadka xirfadleyaasha ah ayaa waxaa ku socda isbeddel ka imanaya suuqyada fursadaha shaqo, taas oo khasbeysa in qofku uu si joogto ah u kororsado xirfado si joogto ah. ayaa kaalin weyn ka ciyaareysa halkan, iyada oo sahashay in qofku helo koorsooyin iyo tababarro leh shahadooyin xirfadeed oo kaabaya kartidiisa shaqo. Waxayna fursad u siinaysaa in qofku isaga oo shaqooyinkiisa ku jira uu si tartiib ah bil walba uu dhammayn karo xirfad cusub oo uu ku darsado keydkiisa xirfadeed iyo aqooneed.

## Fududeynta waxbarashada

Maadaama ay tiknoloojiyaddii ay sii noqonayso laf-dhabarta waxbarashada, waxaa soo kordhaysa ahmiyadda ay leedahay in la helo qaab si siman loo wada heli karo qalab iyo internet sahlaya in waxbarashadii loo sinnaado, mustaqbalkana aan gaarno in qof walbaa uu helo waxbarasho u gaar ah oo ku aaddan xirfaddiisa iyo hibadiisa

## Gunaanad

Ugu dambeyn, mustaqbalka dhow, waxaa jiheyn doona waxbarashada horumarka xooggan ee ay tiknoloojiyaddu ku socoto, iyada oo ay jiraan caqabado, misana waxaa mar walba jira fursado lagu keeni karo hal-abuur ka jawaaba caqabadaha iyo baahiyaha jira. Innaga oo Tiknooloojiyadda si buuxda u adeegsana, waxa aannu awood u yeelan karnaa in aan dhisno nidaam waxbarasho oo horumarsan, xiiso leh, dadkeenuna u simanyahay.

**W/Q:** Engineer Cabdullaahi Bootaan

Director of Garaad Academy



**Xigashada Sawirka:** GIZ










**Website**: https://maragnews.com/
**Email**: editor@maragnews.com

MAJALADDA
MARAG